

# MA NAQAANNAA BADAHEENNA

Bad waxaa lagu qeexaa: Biya Milix ah oo fadhiya dhul ballaaran. Haddaba si aan wax badan uga ogaanno baaxadda badaha waxaa marka hore mudan in wax laga yiraahdo dhulka ay dul saaran yihiin baduhu. Waxaa la og yahay in dhul weynaha aan ku kor nool ndhinac ee woqooyi iyo koonfur. Farqriga u dhaxeeya labadeeda dhex roor (axes) wuxuu la eg yahay 44km, celceliska dhererka gacanku (Radius)=6366km. Sidaas awgeed wareegga (Perimeter) dhulku wuxuu la ekaanayaa 2πR: 40,000km. Bedka dhulkuna wuxuu noqon: $4\pi R^2 = 4*3.1416*6366^2$ =510milyan $km^2$ oo 70.6% ay biyo (Bad yihiin),

lana eg 360milyan $km^2$, halka berrigu (Qaaraduhu) ka yahay: 29.4% oo la eg 150milyan $km^2$. Badaha waxaa loo kala saaraaa iyadoo lagu fadhiisiyay baaxadda: Bad (Sea) iyo Badweyn (Ocean), kuwa hore wey tiro badan yihiin, kuwa danbese waa

5(shan), waxay isu yihiin 3% iyo 97%. Bedka badaha waaweyn: waa kuwaan ayadoo lagu daray Badahooda yar yar.

1. Badweynta Deggan 182 milyan $km^2$.
2. Badweynta Atlantic 82 milyan $km^2$.
3. Badweynta Hindiya 75 milyan $km^2$.
4. Badweynta Barafka ah ee Woqooyi 14 milyan $km^2$.
5. Badweynta Barafka ah ee Koonfur 7 milyan $km^2$.

**Wadarta Bedka Baduhu= 360M.$KM^2$**

Tillaabta noogu xigta waa inaan xaddidno baaxadda badaha dalkeenna ee isugu jira Badweynta Hindiya, Gacanka Cadmeed inta aan ku leenahay labadaba.

Aan ka bilowno xisaabta xadidda dhererka xeebteenna ka soo bilaabata tuuladda lowya Cadde gaartana Raas Caseyr (Guarda fui), siina dhaafta kuna dhamaata tuula yareeyda Daara salaam ee dhacda 4km koonfurta Raas Kiyamboni.

Dhererka xeebteenna waa 3025km[(1)], ayadoo lagu xisaabiyay (ku dhawaad) ahaan labada xeebood ee gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiya in ay kala yihiin 2:3, waa 1210km iyo 1815km sida ay isugu xigaan. Haddaba aan xisaabinno baaxadda badaheenna annagoo og in B/W Hindiya aan ku leenahay 350 N.M (Nautical Miles) oo la eg 648.2km. iyo inaan ku leenahay Gacanka Cadmeed Nus (50%) iyo inta ku beegan xeebteenna

aaga Raas Caseyr. Haddaba bedka badaheenna: 1,800,000 $km^2$ oo u dhiganta: 2.5 jeer dhulka berriga Jamhuuriyadda Soomaaliya. Halkaan waxaad ka garan kartaa aqristoow baaxadda xad dhaafka ah ee badaha Ilaahey inagu mannadeystay leeyihiin oo weliba qani ku ah kheyraadka nool iyo kuwa aan nooleyn. Haddii aan bar bar dhigno baaxadda badaheenna, badaha iyo badweynayaasha Caalamka iyo tan Badweynta Hindiya iyo biya badeedka oo dowladuhu ay wada leeyihiin, xisaabtu waxey noqaneysaa sidaan. (Iyadoo la og yahay in qeyb weyn oo ka mid ah Badaha iyo Badweynayaasha Caalamka la wada leeyahay).

- Badaha Soomaaliya/ Bad & B/W caalamka = 1.8/360 = 0.5%
- Badaha Soomaaliya/ Bad weynta Hindiya = 1.8/75 = 2.4%
- Badda la wada leeyahay Dowladaha caalamka = 318/193 = 1.65mal $KM^2$.
- Badaha Soomaaliya 1.8+1.65=3.45mal $KM^2$ oo u dhigma ku dhawaad 1% badaha Caalamka[(2)].

Haddii badaha caalamka si toos ah loogu qeybiyo dowladaha dunida, mid kasta waxey heli leheyd: 360/193=1.865 mal.$km^2$. Haddaba Soomaaliya waxay si sharci ah u leedahay 1.8+1.65=3.45 m. $km^2$, waa in ka badan laba jeer badaheenna, laakiin dadkeennu (dowlad & shacab) ma og yihiin waxa ay heystaan oon la wada heysan (ALXAMDU LILLAAH).

## Badaha Soomaaliya

Marka aan leenahay Badaha Soomaaliyeed waxaan ula jeednaa Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed.

### Xuduudda Badeheenna

Xuduudda Badaheenna, waxaa lagu caddeeyey warqaddii ka soo baxday xafiiska Madaxweyne Xasan Sheekh, loona diray Xoghayaha Guud ee Q.M, 30/6/2014kii.

Taasoo tilmaameysay Aragtideenna, hase yeeshee si rasmi ah iskuma waafaqin Dowladda Soomaaliya iyo Dowladaha la xuduud-Badeedka sida:-

1. Jamhuuriyadda Jabuuti oon walaalaha nahay
2. Yaman oon laba meel aan xuduud ka leenahay:-
    a) Gacanka cadmeed ( Nuseyntiisa)
    b) Mandiqadda Soqadra.
3. Kenya oo dacwaddeenna xuduud Badeedku ay hortaal Maxkamadda Garsoorka ee Caalamiga ah (ICJ).
4. Waxaa suurtagal ah in ay is gooyaan xuduuddaha badeed ee Soomaaliya iyo Sycheles ee continental shelfiga.
5. Tan ah xuduudda continental shelfiga oo ugu badnaan gaareysa, 150 M.B waxaa laga sugayaa xadiddeeda

Hey'adda Q.M. u qaabilsan howshaan, Soomaaliyana mar hore (2014) ayey dalabkeeda gaarsiisey.

Waad arkeysaan baaxadda Badaheennu ( Bedkoodu) waa mid aad u ballaaran, waxaana lagu qadderaa ku dhowaad saddex jeer bedka Dhulkeenna beriga, waa mahad Alle, waa nasiib iyo nimco aan la wada heleyn.

**<u>Xarriiqinta Xeebaha Dalka</u>**

## I. Gacanka Cadmeed

Xeebtaan waxay ka soo billaabataa xududda u dhexeysa Soomaaliya iyo Dowladda Jabuuti oon walaalaha nahay, waxayna martaa tuulada LOWYA CADDE ($11^0$ 27N, $43^0$ 16E), oo ka jirta Magaalada Jabuuti 13 M.B (Meyl-Badeed) = 24km koonfur bari, halka ay Zeylac ka jirto 15 M.B = 28km, Woqooyi Galbeed. Mandiqadan, waa labada dhinac ee xuduuddee waxaa ku badan Jasiiradaha iyo shacaabiga. Waxaa ugu muhiimsan dhinaca Soomaaliya xagga Jasiiradaha:-

1. Sacduddiin, waxay ka saaran tahay dhinaca waqooyi 6MB=11km, magaalada Zeylac; waxaa ka buuxa jasiiraddaan Dhir waaweyn, waxaana ku nool Cowl iyo Sagaaro, sidoo kale Shinbir badeed, lagu qiyaasay 100,000 (Boqol kun) lamaane.

2. Ceybaad, waa Jasiirad, xoogaa ka yar tii hore, waqooyina ka xigta 3M.B = 5.5km. waxeyna la mid tahay J. Sacduddiin xagga Dhirta iyo xayawaannada ku nool.

   Labadaan jasiiradood, waxay leeyihiin dabeecad gaar ah, xagga noocyada dhirta ku taalla iyo xawaannada ku nool, sidaas awgeed waxay gelisay UNESCO liiska meelaha la ilaaliyo ee Dunida.

   Mandiqadaan waxaa ku badan shacaabiga (Coral Reef) sida:-

   1. Turuxaad: Waqooyi Galbeed ee J.Caybaad (4MB=7.5km)
   2. Filfil: wuxuu Bari ka jira 9 M.B J.Sacduddiin
   3. Siigaale: Bariga Mag. Zeylac 10 M.B
   4. Gacangareet: 30 M.B Bariga Mag. Zeylac
   5. Iyo kuwa kale oo yar yar.

Jasiiradahaan iyo shacaabigaan waxay u suurta geliyeen mandiqadaan inay ku noolaadaan noocyo badan ee kalluun ah, mog weyna leh.

Xeebtaan G.Cadmeed, waxaa kale oy ku leedahay darafteeda kale, waa agagaarka Caluula LAASHASH (khooriyaal), sida:-

1. Khoor Butiyaale, galbeedka Caluula, waa carrab-badeed oo gala dhulka berriga sidii Webi; labadiisa dhinac waxaa ku

yaalla dhir tiq ah. Waxaa isticmaali kara doomaanka iyo maraakiibtaa yar yar wuxuuna leeyahay AHMIYAD Difaac iyo mid Dalxiis.

2. Khoor fuluuk oo ku naban xeebta magaalada Caluula, waa mid dheer: 6MB = 11km, waxaana ka buuxa labadiisa dhinac GEEDKA MANGURUUFKA oo aad u qiimo badan xagga xejinta carraguurka iyo soo jiidashada kalluunka.
3. Khoor CALWEYN Bariga Caluula, 4MB=7.5km, waxaana ka baxa labadiisa daan GEEDKA MANGURUUFKA. Xeebta gacanka cadmeed, guud ahaan waa mid ay ku badan yihiin Dekedo Dabiici ah, waxaana ku yaalla dekedo casri ah sida: Berbera iyo Boosaaso.

   Xagga kheyraadka nool (Kalluun) ee badda xeebtaan badeed aad ayey qani ugu tahay, haddana meelo ka mid ah waxaa ka jira mashaariic iska wanaagsan sida LAAS QORI oo dib loo howlgeliyey warshaddii kalluunka iyo mandiqadda Zeylac oo iyadana wax soo saar wanaagsan uu ka socdo.

## II. Badweynta Hindiya

Waxay ka soo billaabataa Raas Caseyr (Guardafui) oo ah Geeska Afrika, waxayna gaareysaa ilaa Koonfurta Raas Kiyaambooni 4 km. Dhererka Xeebtaani waa 1815km meelahaas, halka ay ka tahay 1210 km meelahas (Gacanka Cadmeed). Guud ahaan

xeebtaan ilaa Hobyo kuma badna shacaabigu, hase yeeshee wixii ka Koonfureeya Hobyo shacaabi ayaa si mug leh u billaabanaaya, waana sii badanaayaa mar kasta oon Koonfur u dhaqaaqno ilaa uu ka gaaro heerka ugu sarreysa Jasiiradaha Jubba ee dhaca Koonfurta Mag. Kismaayo. Xeebtaan waxaa ku yaalla Waqooyigeeda Jasiiradda Xaafuun oo leh dhul weyn iyo kheyraad dhaqaale, mid badeed iyo mid berriba. Sidoo kale Jasiiradu waa goob leh taariikh fog una baahan in daraasad lagu sameeyo. Xeebta dhinaceeda Koonfure waxaa ku dhaca dhul –baraha dunida 15 MB Koonfurta Afka Webiga Jubba. Koonfurta Kismaayo waxaa ku dhaca 10 Jasiiradood oo 6 ka mid ah la deggan yahay, waxayna kala yihiin:

1. (Koyaama, waana tan ugu weyn Jasiiradaha, waxayna leedahay DEKED ay isticmaali karaan Doomanka iyo Maraakiibta yar –yar, waxay ka Koonfureysaa 18 MB = 33 KM Kismaayo. Dadkeeduna waa Kalluumeysato.
2. Jasiiradda Inguumi, waxay ka sii Koonfureysaa J. Koyaama 6 MB =11 M, dad aan badneyn ayaa deggan waana Kalluumeysato.
3. J. Jawaay, waxay dhacdaa Koonfurta J. Nguumi 12 MB= 22 KM, Deked ayey leedahay oy isticmaali karaan Doomanka, dadkeeduna waa Kalluumeysato.

Waxaa ku beegan Jasiiradaan Jawaay LAASH SALAAMA, waa mid dheer (11 MB =20 KM), waxaa ku yaal dhinacyada Laashkaan Tuulooyinka Istanbuul, Bagdad iyo Yamaani, waa meel dhir badan oo ku habboon Dalxiiska.

4. Jasiirada Juula, waxay dhacdaa Koonfurta Jawaay 12 MB, waa tan ugu dadka badan Jasiiradaha, weliba waxaa la dhihi karaa waa Caasimadda Jasiiradahaan; waxay leedahay Deked meel dhexaad ah, dadkeedu waa Kalluumeysato, Beeraley iyo xoolaleey isla Jasiirada dhexdeeda, waxaana ka jira ganacsi dibadeed. Waxaa ku beegan J. Juula LAASH CAANOOLE, wuxuu jeedaa 10 MB (18 KM), waxaa ku taalla Afkiisa Tuulada Kudhaa, waxaa ka baxda waddo ku xirta Kudhaa Magaalada Badhaadhe.
5. J. Darkaasi, waxay dhacdaa 3 MB = 5.5 km Koonfurta J. Juula, dad yar oo Kalluumeysato ah ayaa deggan.
6. Jasiirada Jandard, waxay Koonfur ka xigtaa 6 MB = 11 KM J. Darkaasi, ma weyna, dad yar ayaana deggan oo Kalluumeysato ah.

**<u>LAASH BUURGAABO</u>**

Laashkaani wuxuu Koonfur ka jiraa J. Jandara, Laashkaani waa midka ugu muhiimsan Laashashka mandiqaddaan waa kan ugu ballaaran uguna dheer: 15 MB = (27 KM), waxaana adeegsan

kara Doomanka iyo Maraakiibta yar yar, haddii la hagaajiyana Maraakiibta dhexe. Waad dareemi kartaa aqristow ahmiyadda weyn ee Laashkaan ee dhinac kasta, Nabadgelyo, Difaac, Dalxiis iyo Ganacsi Dagaalkii 2aad ee Dunida waxaa adeegsaday Ingiriiska.

Xeebtaan Badweynta Hindiya waxaa ku yaalla Dekedo iyo Magaalooyin muhiim ah sida Magaala Madaxda Dalka iyo Dekeddeeda weyn.

Xeebtaan waxaa ku yaalla Dekedo macmal ah sida Hobyo, Cadale, Warshekh, Barawe iyo kuwo fara badan oo ah dabiici. Sidaas awgeed xeebaha Soomaaliya aad ayey ugu fiican yihiin ganacsiga, laakiin difaaca kuma sahlana.

Xeebtaan waxay sii mareysaa tuulada Raas Kiyaanbooni ($1^{0}$ 39′ S, $41^{0}$ 35′ E), waxayna sii dhaafeysaa ilaa xuduudda aan la leenahay Kenya oo ka sii koonfureysa Raas kiyanibooni 2M.B (4 KM). halkaa waxaa ku yaal Tuula-yareyda Daarasalaam ( $1^{0}$ 40′ S, $41^{0}$ 33′ E) oo soo galeysa dhinaca Soomaaliya, waxaana xagga Badda xeebta ka saran kuna beegan Tuulada Daarasalaam Jasiirado yar yar oo dhagax ah waa shan isku dhow dhow, loona yaqaan LAMASHAANKA. Xuduud badeedka labada Dowlo ee Soomaaliya iyo Kenya waa xarriiqin toosan oo dhinaca koonfur (midigta) ka mareysa Jasiiradaha shanta ah oon soo sheegnay.

Sidaas waxaa lagu xaddiday heshiiskii 25/July/1924tii ee Ingiriiska iyo Talyaaniga oo labada dhinac kala xukumaayey.

### III. Jaziiradda Suqadra:

Suqadra waa jasiirad weyn oo ku beegan Raas-Caseyr, una jirta ilaa 100M.B, halka ay u jirto Yaman 200M.B. Haddana Yaman ayaa sheegata lahaanshaheeda. Waxaa ku lifaaqan Suqadra Jasiirado yar yar oo la yiraahdo: Cab/lla Kuuri dhinaca Galbeed, J. Walaalaha oo ah laba iska yar yar xagga Bari. Dhamaan Jasiiradahaan yar yar waxay dhacaan masaafo u dhexeysa Suqadra iyo xeebta Soomaaliya oo ah 50 M.B.

Jasiiradda Suqadra waxaa ku nool 4 (afar) qoomiyadood oo kala ah: **Meheri, Soomaali, Hindi iyo Afrikaan.** Jasiiraddaan waxaa ku nool xoolo, tacabna waa jiraa, sida Timirta iyo Geedaha Daawada, hase yeeshee, jasiiradahaan, sida ay sheegeyso UNESCO waxaa ku yaal dhir aysan jirin meel kale oo laga heli karo Adduunka; sidaas awgeed waxay ku dareen liiska meelaha la ilaaliyo Caalami ahaan.

## Gunaanadka Maqaalka

Maxaase kala gudboon Soomaaliya Badaheeda:

1. Inay garato sida ay u heshay sed-bursi sal sharci leh
2. Inay ALLE weynaaye ay ku shukriso waxa uu ku mannadeystay.
3. Inay Soomaalidu u howlgasho sida ay u:

a- Hanan leheyd Badaheeda

b- Soo hoos keeni laheyd siyaadadeeda (Qarannimadeyda).

c- Uga dhigi leheyd Badaheeda kuwa bed qaba deegaan ahaan.

d- Inay u guntato sida ay isaga maali laheyd irmaanka Badaheenna oon gureyn, sida ay u hubiso amnigeeda quudka (Food Security).

e- Inay ka qeybgasho ka faa'iideysiga badda la wada leeyahay oo ay ka leedahay 1.65%.

**Xigasho:**


1. Atlaska Soomaaliyeed UNESCO,UNDP: 2004
2. Xisaabinta Qoraha
3. Aaydda 14aad ee Suurat Al-NAXL


F.G. Macluumaadka maqaalka badankiis waxaa laga Soo xigtay Buugga Qoraha ee Tobogaraafiyada Xeebaha Soomaaliyeed.

**W/D: ADM. GAAS PROF. Faarax Axmed Cumar**
**Guddoomiyaha Hey'adda C.B.S.**

# DEEGAAN BADEEDKA SOOMAALIA

**Diyaariyay: Waaxda Deegaanka & Culuumta Badda**

## Hordhac

Deegaanka baddu waa midka ugu wayn uguna ballaaran aduunka deegaan ahaan, waxaana la sheega inuu ka yahay dhulka marka loo qeybsho saddex qaybood labo ka mid ah, wuxuuna ku fadhiyaa dhul gaaraya 139 milyan square meyl ama 360 milyan square kiilomitir, ayadoo celcelis ahaan biyaha guntooda lagu qiyaaso kuwo gaara ilaa 3.8km ama 12500 feet. hadaba ayadoo biyuhu ay yihiin kuwa ugu badan adduunka, ayna ka yihiin in ka badan boqolkiiba 70% dhulka dushiisa, ayey Biyaha Badduna ka yihiin boqolkiiba sagaashan iyo todobo (97%) biyaha kale.

Deegaanka baddu waa mid ka kooban biyo cusbadu ku badan tahay oo dhanaan, hadana ah hooyga noolaha ugu badani ku noolyihiin dhulka korkiisa, kana kooban nuucyada noolaha sida dhir iyo xayawaanba, waxaana lagu qiyaasaa boqolkiiba 80% in

ka badan nooluhu inay ku noolyihiin deegaan badeedka, inta soo hartay ayaa ku nool dhulka Barriga, taasi oo ka dhigeysa deegaan badeedka mid muhiimad gaar u leh Bini'aadanka, xag dhaaqaale iyo cuntaba.

Deegaan badeedka Soomaliya xagga dhirarka xeebta, waa ka ugu dheer Qaarada Africa, waxaana lagu qiyaasaa inuu gaarayo dhararkiisu ilaa 3,025 kilomitir, dhinaca gudaha badda deegaan ahaan Soomaaliya waxay xaq u leedahay  ilaa 200 oo mayl oo ka bilaabanta xeebta. Deegaan badeedka Soomaliya wuxuu Saddex jeer ka badan yahay dhulka barriga. Waxaana ku nool dhamaan noocyada noolaha ku nool dhul kuleylaha ama kuleyl xigeenka ah, inkastoo noolaha qaar badan oo ka mid ahi sii dabar go'ayaan, sida diin badeedka (Qubada), kaasoo Adduunka mamnuuc ka ah ugaarsigiisu, ayaa inaga aad loo ugaarsadaa oo celcelis ahaan maalintii ilaa 10 xabo lagu qalaa muqdisho oo kaliya oo dhidig u badan, inkasta oo Shariciga kalluumeysiga Soomaliya u mamnuucayo in la soo dabo ama la cuno.

## Muhiimada Deegaan Badeedka

Nolosha noolaha adduunka waxay ku noolyihiin biyaha dhexdooda boqolkiiba sideetan 80%, sidaa awgeed, deegaan badeedku waa ka ugu muhiimsan nolosha noolaha, sida ay sheegtay hey'adda qaramada midoobey qeybteeda Bii'ada; deegaanka badda waxaa ku nool  ilaa 178,000 nuuc oo ah noole

kala duwan, kana kooban xayawaan iyo dhirba. Deegaan badeedku wuxuu ina siiyaa cunto, tamar iyo biyo kuwaasi oo aay ku tiirsanyihiin nolosha malaayiin qof adduunka, waana marinka ugu muhiimsan ee ay iskaga kala gooshaan (gudbaan) Badeecadaha ganacsiga Caalamka Boqolkiiba 90%.

Muhiimada Deegaan badeedka waxaa kale oo ka mid ah kuwan soo socda:

- ✓ Dhirta deegaan badeedku waxay bixisaa Hawada Ogsijiinta (oxygen) oo noolaha kala duwan u baahan yihiin, sida Bini’aadanka oo neefsigoodu ku xiranyahay.
- ✓ Deegaan badeedku waxay qayb wayn ka qaataan hagaajinta cimilada sii xumaanayaa
- ✓ Baddu karboonka ugu badan ayadaa Hawada ka soo nadiifisa,
- ✓ Deegaanka baddu waxay nuugaan kuleylka qoraxda ka yimaada haaf in ka badan, waxayna ka qeybqaataan qaboojinta Hawada.
- ✓ Biyaha baddu waxay qeyb ka yihiin sameysiga biyaha roobka

**Qeybaha Deegaan Badeedka**

Deegaanka Badda waxaa loo qaybshaa labo (2) qaybood oo kala ah;

1. Biyaha kore iyo
2. Kuwa hoose ee Sagxadda dhulka

Hadaba Biyaha kore (pelagic water) waa lakabka sare ee biyaha furan ee badda, hoyna u ah noolaha ugu badan ee badda ku nool, gaar ahaan kuwa cuntadooda sameysta, waana deegaan ay gaari karto falaaraha iftiinka qoraxda oo muhiiim u ah xagga cunta sameysiga, taasi oo dhirtu cuntadeeda ku sameysto (photothyntheisis) ka dibna noolaha kale een iyaku cunto sameysan ay ku sii dulnoolyihiin, waxaana loo yaqaanaa wax soo saara 1aad (primary producer) ee silsilada cuntada noolaha. Tamarta qoraxda ka timaadaa waxay si fiican u gaartaa lakabka ugu sareeya biyaha oo ah ilaa 200m oo hoos ah. Noolahan ku nool lakabka sare ee deeegaan badeedka, waa kuwo ay yartay socodkoodu, waana kuwo intooda badan salala (floating) Biyaha dhexdooda, waxayna inta badan ka badbaadan noolaha kale ee quudanaya ee ku nool biyaha hoose Badda.

Biyaha kore waxaa ku badan dhaqaaqa, hirdinka iyo wareega Biyaha, si fududna waxaa saameyn ugu leh isbadalka cimilada, sidaa awgeed waa kuwo degdeg isku bad badala, saameyn weyna ku leh noolaha degan biyaha furan (Open Ocean).

Deegaan badeedka hoose waa mid ilaaa sagxadda hoose ee badda, oo ay fariistan ciida iyo nafaqada kala duwan ee ka timaada Barriga ama noolaha lakab ka sare ee badda ku nool, ka dibna baddu waxay sameysaa is rog xagga biyaha, waxaana kor soo mara wiixii hoos jirey sida nafaqada oo marka danbe ay helaan noolaha sare, waxaana loo yaqaanaa isrogroga biyaha badda (upwelling).

Deegaanka hoose dhirtu waa ku sii yarataa, markasta oo iftiinka qoraxda laga sii fogaado, dhirta u baahan sagxadda dhulka iney qabsato ee isticmaala xidida, waxay ku noolyihiin biyaha xeebta xiga, sida cawska badda oo kale.

**Deegaanka Badda**

Deegaanka Baddu waa mid iskugu jira wax nool iyo wax aan nooleyn oo Saameyn isku leh, waxaana ka soo qaadaneynaa kuwan hoos ku xusan;

- ✓ Biyaha Badda
- ✓ Iftiinka Qorraxda
- ✓ Dabeylaha
- ✓ Dhir badeedka iyo
- ✓ Xayawaanka Badda

**Astamaha Biyaha Badda xagga fisikada (Physical) iyo kimikada (Chemical)**

Astaamaha biyaha dhanaan xagga muuqaalka (physical) iyo curiyayaasha (chemicals), marka la eego deegaanka badda, way

ku kala duwan yihiin astamahan, hadey tahay gunta hoose ee Badda, ama kuwa u soo dhaw dhulka barriga.

Haddaba biyaha dhanaan waa kuwo ka kooban boqolkiiba 3.5% waxyoolo ku milman biyaha, sida Biro, Hawooyin, dhagax burburtay, Carro iyo waxyaalaha ka yimaada qaraxyada folkaanada (Volcanic activity), sidoo kale waxyahaba ka yimaada noolaha dhintay ee loo yaqaano (Organic matter), oo ka haray ama ka yimid noolo dhintay, sida Carbon oo kale . Biyaha saafigana waxay yihiin boqolkiiba 96.5%, marka laga reebo waxyaalaha ku millan sida curiyayaasha ay ka sameysantahay milixdu (cusbadu), ama nafaqada ku jirta biyaha badda.

Meelaha ay ku kulmaan biyaha macaan ee ka taga barriga iyo biyaha dhanaan ee badda, laguna yiraahdo afka qalaad (Estuary or salt marshes). Halkani waa meel ka astaamo duwan deegaan badeedka intiisa kale oo waxaa ku kulmay biyaha macaan iyo kuwa dhanaan ee Badda, waxana laga helaa dhulka xeebta ee bariga u dhaw, waxana ku badan nafaqada, sidaa awgeed, waxay hoy u tahay noole kala duwan oo iskugu jira dhir iyo xayawaanba oo adkeysi u leh ku noolashaha meeshan ay ku wada kulmeen labada biyood kuwa Badda ee dhanaan iyo kuwa macaan side biyaha wabiga.

## IFTIINKA CADCEEDA

Iftiinku waa mid ka yimaada cadceeda kaasi oo ku dhaca,  qaybta sare ee  biyaha badda kaasi oo u sii gudba qaybta hoose ee loo yaqaan benethic, waxuna leeyahay cabir lagu cabiro oo uu gaar ah, sida caadiga ah iftiinka cadceeda markii uu ku dhaco qaybta sare ee badda waxaa ka sii gudbo falaaro iftiin ah kuwaasi oo ay u baahan yihiin noolaha badda siiba dhir badeedka, waxaa jiro qaybo uu kala qaybsamo taasi oo muujinaysa heerka iftiinka ay gaari karto iyo wax tarkeeda, iftiinka cadceeda ee gaaraya badda waxaa loo qaybiyaa illa laba qaybood wax afka qalaad lagu yiraahdo photic iyo dysphotic

a. Photic: waa iftiin gaaraya illa 200 mitir ee gunta badda kaasi oo dhir badadeedka ka saacida in ay sameeysato cuntadeeda, sidoo kale ka hesha midabeyta dhirta.
b. Dispohitic waa qaybta labaad ee iftiinka cadceeda , qaybtaan waa mid gaarayaa laga bilaabo 200 ilaa 600m oo gudaha badda, waxayna kaliya ka caawisaa noolaha badda sida xayawaanka in ay wax arkaan kuna socdaan balse waa mid aanan waxba u tarayn dhir badeedka maadama aysan iftiinkeeda ku samaysan Karin cunto.

**DABAYLAHA**

Dabeeylaha deegaan badeedka waa kuwa dhaqaajiya biyaha badda, waxayna qaabeeyaan badda ayagoo u suureeya mawjado iyo hirar raac raac ah oo kala ah; kuwo culus iyo kuwa fudud.

Dabayl badeedku waa kuwo looga faa'ideysto dhalinta koronta dabiici ah, si looga maarmo isticmaalidda shidaalka lagubayo ee sababa in kaarboon badani galo hawada, sidoo kale dabayl badeedku waxeey wax tar u leeyhiin deegaanka badda, kuwaasi oo badda u sahala in ay isku dheeli tirnaato, ayadoo samaynaysa in ay sahasho rogonka biyaha, si ay nafaqadu kor u soo marto, sidoo kale waxay ka qayb qadataa gudbinta ama gaarsinta oxygenta. Geesta kale waxaa jiro saamayn kale oo halis ah oo ay keento dabeyshu noolaha badda, waxayna ka qayb qaadataa musiibooyinka dabiiciga ah (rabbaani) ee ka dhaca badaha sida bad gariirka (Tsunami) oo kale.

## DHIR BADEEDKA

Dhir badeedku waa kuwo ka baxa deegaanka badda meel ay gaari karto iftiinka cadceeda, si ay u ugu sahasho cunto sameysiga, dhir badeedka waxaa loo qaybin karaa laba qaybood oo kala ah algaha iyo dhir ku baxdo biyaha cusbada leh.

Nooca alagaha (Algae) asagana waa mid leh qaybo kala duwan sida algaha cas (red algae), algaha cagaaran (Green algae) iyo brown algaha.

a. Algaha cas (red algae), noocan waa midka oogu wayn dhir badeedka waana kan sahla in ay sameysanto acshaabta (coral reefs).

b. Algaha cagaaran (Green algae), dhirtan waa kuwo midabka ay leeyihiin uu yahay cagaar, kuwaasi oo sameeya iftiin aad u qurx badan, sida ay sheegeen cilmi baarayaashu
c. Brown algaha waa mid midabkiisu cawlaan yahay, kuna nool deegaan badeedka, inta badan dhulka qabaw, wuxuna garaa ilaa 1500 oo nuuc.

Dhirabadeedka guud ahaan waxuu kaalin wayn ku leeyahay noolaha badda sida xayawaan badeedka, ayagoo ka helayo cunto iyo oxygenba, waxaanan shaki lahayn haddii aysan jirin dhir badeedka in ay dhibaato lixaadleh gaari lahayd noolaha intiisa kale. Sidoo kale dhirbadeedku waxeey wax tar uleeyihiin noolaha bariga iyo guud ahaana caalamkaba.

**XAYAWAAN BADEEDKA**

Badda oo ay ku noolyihiin xaywaano aad ubadan oo aan tiradooda si buuxda loo soo koobi Karin ayaa haddana waxaa loo qaybiyaa labo qaybood aad u waa wayn oo kala ah kuwo lafdhabar la’hayn (invertebrates) iyo kuwo laf dhabar leh (vertebrates).

a. Kuwo aanan lafdhabarta lahayn (invertebrates)

Waa nooc ku nool deegaan badeedka kaas oo aan lahayn wax lafdhabar ah waana nooca intiisa badan isu yara eg. Sida lasameeyay darasooyin dhowr ah waxaa muuqata, in ay lagama

maarmaan tahay in lagu sameeyo daraasoonyin dheeri ah noocaan aanan lafdhabarka lahayn, sida ay usii qaybsamaan qaybaha aana cadeeyn kala saaristooda balse aad isu shabaha.

Waxaa xusid mudan in ay jiraan xayawaano aan lafdhabar lahayn balse gabaad iyo ku noolasho ka dhigta qolof, sida kuwa ku dhex nool bacoolaha. Bacoolaha ayaa ah qolof ay ku dhex noolyihiin xayawaano kuwaasi oo markii ay ka dhex baxaan iska noqodo qolof meel iska yaalo balse aad loo jecelyahay.

Bacoolaha ayaa ah kuwo aad qani ugu ah deegaan badeedkeena waxayna muujinaysaa in ay jiraan in xayawaan badeed badan oo ku nool bacolaha ay jiraan. Soomaliya oo leh xeebta ugu dheer Afrika, ayaa waxaa ku nool xayawaan badeed aad u badan kuwaasi oo noqon karo kuwo laf dhabar leh iyo kuwa aana lafdhabar lahayn.

b. Laf dhabar leeyda (vertebrates):- Xaywaan badeedka laf dhabar leeyda ah.

Xayawankaan waa kuwo ku nool badda waxeyna leeyhiin qaybooyinka kala duwan oo kala ah sida kaluunka, qubada, shimbiro badeedka, xamaaratada iyo kuwo naasleey ah.

Xaywaanadana dhamaantood waa kuwo mid kasta leh farcyo kala duwan ama noocyo kala duwan, waxaana xusid mudan in

dhamana xaywaan badedkan aan kor ku soo xusnay dhamaantood laga helo deegaan badeedka Soomaaliya.

Xeebta Soomalia ayaa lagu sheegaa in ay tahay mid ogu dheer Africa, ayadoo dhararkeedu yahay 3025 km, waxaana laga helaa nooc kasto oo ah noolaha deegaan badeedka guud ahaan iyo gaar ahaan xaywaan badeedka qaybihiisa lafdharleyda iyo kuwa aanan laf dhabarta lahaynba sida ay baahisay daraaso la sameeyay sanaddii 2015, taas oo muujineeysa in biyaha soomaliya sanadkiiba laga qaato boqolaal kun oo tan taas oo lacagteeda lagu qiyaaso 300 oo malyan sanadkiiba in laga xado biyaha soomliya.

## DHIBTA KU SOCOTA DEEGAAN BADEEDKEENA

Dhibta lagu hayo deegaan badeedka ayaa ah mid aad u baaxad wayn, dhibtaas oo iskugu jirto mid ka imanayso barriga gaar ahaan magaalooyinka saaran xeebaha iyo mid caalami ah oo ay geystaan maraakiibta shisheye ee mara baddeenna

### Wasakheynta Badda ee ka timaada barriga

Sida la ogyahay wasakheynta deegaan badeedka ayaa ka timaada boqolkiiba sideetan (80%), xagga barriga, sida bulaacadaha qashinka oo toos loogu shubo oo isku jiro waxyaabo sun ah sida sunta Beeraha, xawayaanka lagu dilo iyo chemicals kala duwan oo lagu isticmaalo barriga ka bacdina biyaha roobku uqaadan

xaga badda ka dibna gaaraan deegaan badeedka ay ku noolyihiin noolaha kala duwan ee uu ka midka yahay kalluuunka.

**Xaalufinta ay ku hayaan maraakiibta shisheeye deegaan badeedkeenna**

Ayadoo wali Soomaliya ayna lahayn Ciidan qalabeysan oo ilaalin kara soohdimaha deegaan badeedkeena, ayaa waxaa dhacda in ay wadamada shisheeye si sharci darra ah uga kalluumeystaan biyaheena, kuwaasi oo si xad dhaafa u buburinaaya sagxadda hoose ee badda, una kalluumeysanaya si dabar’goyn ah qaar ka mid ah kalluunka.

**Dhibta ay ku hayaan maraakiibta wada shixinadaha ganacsi:**

Maraakiibta kale ee iskaga kala goosha biyaha Soomaliya ayaa qaarkood waxeey wasakh ku shubaan biyaha Soomaliya, kuwaasi oo ah kuwo aanan kutalagal ahayn, sida shidaal ku daata iyo kuwo kutala gal ah, waana kuwa baadeena u adeegsada meel qashinqub ah, waxayna baddeenna ku duugaan qashin, sida Haaman ay ku jiraan qashinka haraadiga Nugliyeerka (nuclear), kuwaaso qaar badan oo ka mid ah lagu arko Xeebaha ayagoo baddu soo caaridey, inkastoo wali la aqoon heerka halista waxa ku jira Haamaha. Ayadoo ay Hey’adda cilmibaarista Badaha ee qaabilsan cilmi baarisa arrimaha badda, ku hawlantay sidii ay u heli laheyd qalab ay ku ogaato waxa ku jira hamahaas.

**Xigasho:**


1. http://enviroguides.us/content/%E2%80%93what-marine-environment
2. https://seaambassador.com/2015/07/05/the-importance-of-marine-environment/
3. https://www.britannica.com/science/marine-ecosystem
4. http://saltwaterstudies.com/wp-content/uploads/2015/07/Introduction-Marine-Environment.pdf
5. http://www.enchantedlearning.com/biomes/ocean/twilight/
6. Jet Stream (2008). "Origin of Wind". National Weather Service Southern Region Headquarters. Retrieved 2009-02-16.
7. http://www.ucmp.berkeley.edu/greenalgae/greenalgae.html
8. Living Ocean *NASA Science*. Retrieved 17 December 2016.


# Qaab nololeedka qaar ka mid ah kalluunka sii dabar go'aaya ee Somalia


**W/D: Waaxda Khayraadka & Dhaqaalaha Badda**


## Hordhac

Waxaan maqaal kan si kooban ugaga hadlaya qaar ka mida kalluunka sii dabar go'aya ee biyaha dalkeena Somaliya. Hadaba Kalluunku wuxuu ka midyahay khayraadka nool ee laga helo badda, wuxuuna ka koobanyahay bahooyin Kala duwan oo la isu raaciyo astaamaha aywadaagaan.

Kalluunka kunool biyaha badda Soomalia waa mid sii yaraanaya, waliba qaarka mid ah kalluunka ay sii dabargo'ayaan, ayadoo dhinaca kale aywadan maraakibta shisheeye xaalufin xad dhaaf ah oo sharci darro ah, sida lagu qoray buuga **SSF** (**Securing Somali Feshiries**), taas oo ay ku shegeen in ay jiraan qaar ka mida

kalluunka kuwaas oo sii yaranaya jiritaan kooda nolaleed ee biyaha Somalia.

Haddaba Waxaan si gaar ah uga hadli donaa nuucyada ay yihiin kuwa sii dabarga’aya, qaab nolaleed kooda, sida ay utarmaan, noocyadooda kala duwan, goobaha laga helo iyo qaabka uu usamaysanyahy hab dhiskooda.

Noocyadan waxay ka midyihiin kalluunka sii dabargo’aya;

- ✓ Sumeyn (Groupers)
- ✓ Cangub (Snaper )
- ✓ Fangalaati (Goat Fish )

**Sumayn (Groupers)**


Noocyadan kalluunka ah waxay is kugu jiraan bahooyin badan (species) ku waas oo sii kala leh Qaybo kala duwan, waxayna leeyihiin jir adag, uma samaysna jirkoodu inay garaan masaafo aad u fog, waana kuwa oradka badan,

dhanka kale jismigooda Waa balaaranyahy, dhererkana way ku kala gadisanyihiin ,midka ugu dheer uguna balaaran waxaa loo yaqaan (goliath grouper) culasykooduna waxa uu la egyahay 455 kg, laakin malaha ilko badan marka La eego dhinacyada damankooda,

waxay leeyihiin  oo kaliya saxan yar oo kuyaala dhuunta una samaysan sida ilkaha, kaas oo ay u adeegsadaan burburinta cunnada. Nuucyo kamida ah kalluunkan waxay quutaan kalluunka yar yar iyo Anyax badeedka (**Crustaceans**), qaar kalena ay yihiin kuwa wax ugaarsada, mararka qaar waxay wareerari karaan bini'adamka.Nuucyadan kalluunka ah waxay muhim u yihiin dhanka cunnada iyo in la beero.

Xog aan ka soo aruurinay kaluumaystada Xeebaha gobolka Banadir waxa ay sheegaysa in Sumayn (Groupers) waqtiga la helo in aytahay billaha ugu horeeeya ee sanadka, Janaayo, Febarayo, iyo Maarso.

Sidaan kor ku soo xusnay kalluunkan waxa uu ku jiraa nuucyada kalluunka ee ka sii dabar go'aya dalkeena Soomaliya, xogtaas oo aan ka soo xiganay buuga (**securing Somali fisheries),** Hadaba waxaa lagama maarmaan ah in laga ilaaliyo ka ganacsiga kuwa sii dabar go'aya ee kalluunkan, Gaar ahaan in la joojiyo kalluumaysiga sharci darada ah.



Nuuc ka mida Sumeyn (*Epinephelus malabaricus)*

**Fangalaati (Goat Fish)**

Kalluunka nuucan ah wuxuu ka kooban yahy bahooyin (species), waxaana lagu magacaba (**red mullets Family),** waxa uuna ka mid yahay nuucyada kalluunka ee sii dabargo'aya una baahan in la ogaado qaab nolaleed kooda iyo qaab dhismeedka jirkooda, marka la eego waa kuwa dheer oo fitsan, oo leh sayn (tail), Dhexroor leh oo labada Cirif ee saynta dheeryihin, waxayna leyihiin garbo dhabarka ku yaala oo kala qaybsan, sidoo kale waxa ka mida astaama hooda inay leyihiin laba gees ku waas oo leh dareen ay ku kala gartaan meelaha cunnada leh, inta badan kalluunka noocan ah waa mid midab ifaaya leh, bahda ugu balaaran dhererkoodu Wuxuu gaarayaa ilaa 60cm, inta kale way ka yaryihiin. Goobaha laga helo nuucyadan intooda badan waxa laga helaa biyaha

hoose, qaar kamidana waxay gaari karaan 500m, sidoo kale nuucyo kamida waxa laga helaa goobaha shacaabiga ku badanyhay.

Kalluunka nuucyadan ah waxay quutaan kalluunka yar yar, gooryanada (**worms**), anyax badeedka( **crustaceans)** iyo bacoolaha(**Mollusca),** nuucyadan waxay awood u leeyihiin inay badali karaan midabkooda si deg deg ah, qaar ka mida bahooyinkan waxay leyihiin midab casaan xigeen ah, waxayna samaystaan waqtiga ay nasanayaan oo ay galayaan carada si ay u noqdaan kuwa ka qarsoon kalluunka kale ee wax ugaarsada.

Nuucyadan kalluunka waxay utarmaan in ay ukumahooda kusii dayaan biyaha badda, waxayna si xor ah u sabaynayaan biyaha badda ilaa ay ka dilaacdo, kadibna uu noqdo dhalaan (larvae) kaas oo ugu danbeyntii biyaha horuumar ku sameynaya mudo 4 ilaa 8 isbuuc Biyaha gudahooda.

Dhaqaale ahaan nuucyadan kalluunka aad baa looga faa'idaystaa aduunka, gaar haan Soomaliya, waxayna ka midyihiiin nuucyada kalluunka ee sii dabar go'aya oo la rabo in laga caaganaado (fogaado) ka ganacsi gooda ama kalluumasyiga sharccidarda ah.


Two whitesaddle goatfish

**Cangub (Snaper)**

Nuuucyada kalluunkaan waxay bahooyin kooda (species) ka badanyihiin 100, qaab dhismeed ka jirkooda waa mid fitsan (elongated bodies), af balaaran ayay leyihiin, ilko aad u fiiqan Way leyiiin, sidaas oo kale sayn (tail) godan oo dhexroor leh ayay leyihiin. Inta badan nuucyadan kalluunka waa kuwa ballaaran waxayna gaarayaan qarkood 60 ilaa 90cm, Inta badan waa kalluunka wax u gaarsada sida kalluunka yar yar iyo anyax badeedka. Noocyadan kalluunkan xogta aan ka helnay kalluumaystada somaliyed waxay inala wadageen in noocyadan la helo xillilayada kala gadisan ee kalluumaysiga, inta badan waxaa laga helaa Biyaha dhexe ee badda. Kalluunka nuucyadan ah waxay ka mid yihiin kuwa sii dabar go'aya una bahan in la dhowro lagana fogaado ka ganacsigiisa iyo kalluumaysiga sharcidarda ah.



**Nuuc ka mida Cangub (Snaper)**

Reference;

1-Securing Somali Fisheries
2-https://www.britannica.com/animal/grouper
3-Securing Somali Fisheries
4-https://en.wikipedia.org/wiki/Goatfish

# KALLUUNKA DILAAGA (VAMPIRE FISH)

Kalluunka **VAMPIRE** (Dilaa) Waa kalluun ku nool Biyaha mac, laguna naaneeyso **PAYARA** ayaa ah kalluun laga helo wabiga **AMIZON**, waxuu leeyahay miciyo dhererkooda gaarayaan 1.5 illaa 3 inch oo uu wax ku qaniino balse aanan dhiigeeda waxa uu qaniino uusan dhuuqin.waxuu leeyahay dhago dherekooda gaarayo illa 6 inch oo ku yaalo daamanka (qalka) hoostooda .

**PAYARA** waxuu ku caan noqday dagaal uu ku sameeynayo kalluunada kale ee la nool sida kalluunka dahabiga (golden fish) ayaa ah kalluun inta badan la nool waxaana khubarada xananeeyo kalluunka (PAYARA) lagula taliyay in ay kaligiis ku xeeyndaabaan (Deeyr adaga oo uu wax ka arki karo balse ay ooga nabad galiyaan kalluunada kale).





**VAMPIRE FISH**

## Dowladda Soomaaliya iyo Shirkado Shiinees ah oo heshiis Kalluumeysi ku kala saxiixday Nairobi



04/July/2018

Wasiirka Kalluumeysiga iyo kheyraadka badda ee dowladda Soomaaliya C/raxmaan Maxamed Cabdi Xaashi ayaa magaalada Nairobi heshiis horudhac ah kula gaaray Madaxa shirkaddaha Kalluumeysiga dibadda ee dalka Shiinaha.

"Waxaa maanta heshiis kalluumeysi oo hal sano ah la saxiixannay madaxa ugu sarreyo shirkadaha dibadda ee dalka shiinaha Mr Davy Chen, si aan ugu faa'ideysano kheyraadka baddeena waxaanan si dhaw ula socon doonaa kalluumeysiga shirkadaha dalka shiinaha ee imaanaya dalkeenna"ayuu yiri Wasiirka Kalluumeysiga.

Sidoo kale Wasiirka ayaa sheegay in shatiyada kalluumeysiga la siinayo shirkadaha dalkaasi shiinaha ee ka shaqeeya kalluumeysiga, isla markaana ay si dhow ula socon doonaan kalluunka ay soo saaraan iyo la dagaallanka shirkadaha sida sharci darrada ah uga kalluumaysta dalka Somalia.

Wasiirka ayaa tilmaamay in qorshaha wasaaradda kheyraadka u yahay sidii looga faa'ideysan lahaa kheyraadka baddeenna, iyadoo fursadan ka faa'ideysan doonaan dad badan oo dan yar ah waxana heshiiskan goob jog ka ahaa xoghayaha koobaad ee safaarada Soomaaliya ee Dalka Kenya Habiib Mohamed Egal.

Wasiir C/raxmaan ayaa sheegay in bisha September ee soo socota uu Madaxweyne Farmaajo uu booqasho ku tagi doono dalka Shiinaha, halkaasoo uu uga qeyb geli doono shir looga hadlayo arrimaha kalluumeysiga iyo xiriirka labada dal ay wadaagaan.

Dowladda Soomaaliya iyo maamul goboleedyada ayaa bishii hore ku gaaray magaalada Baydhabo heshiis ku saabsan wadaagga kheyraadka dalka.

**Xigasho:** http://www.jowhar.com

**Daraasad kusaabsan Xeerarka Badda, Heer Caalami, Heer Gobal, iyo kuwa dalka JFS ay yeelatey.**

Aduunka aan ku noolnahay waxaa xili hore oo laga joogo hal qarni la soo bilaabay iskudabaridka arrimaha Badaha ka dib markii loo arkey baahi dhankaas ka jirta, xiligaas oo Badaha aduunka ay ku soo badatey shilalka ay galaan maraakiibta xamuulka dadweynaha iyo kuwa qaada badeecadaha isaga goosha badaha Caalamka oo idil, waxaa la hirgaliyey sharuuc iyo xeerar lagu maamulo arrimaha badda si loo helo bad nadiif ah oo ka caagan dhibaatooyinka ka iman kara gaadiidka adeegsanaya badaha dhexdooda, waxaan ku bilaabaynaa xeerarka caalamiga ah

ama heshiisyada caalamiga ee arrimaha Badaha oo ay hirgalisay Hay'adda Caalamiga ee arimaha Badaha Aduunka oo loo soo gaabsho magaceeda (IMO) International Maritime Organization.

### i- Heshiisyada Badaha ee heer Caalami (International Maritime Conventions).

Heshiisyada badaha ee heer caalami waa heshiisyada loo ansixiyey qaab caalami ah oo ay hirgalisay hay'adda caalamiga ah ee Badaha aduunka (IMO), heshiisyadaas waxaa saxiixay Dowladaha xubnaha ka ah IMO oo dhan tiradooda 173 dowladood, xarunta ay ku shaqeyso waxay kutaalaa hay'adda dalka UK magaalada London, hay'adda qaab dhismeedkeeda wuxuu ka kooban yahay sadex qaybood Gole Guud, Gole dhexe, Guddi hoosaadyo, golaha guud wuxuu shiraa labaddii sanaba mar waxaana kasoo qaybgala dhammaan dowladaha xubnaha ka ah hay'adda, waxayna qabtaan iney doortaan xubnaha golaha dhexe, dajinta miisaaniyadda, ansixinta qorshe hawleedka hay'adda, hadaba hay'adda caalamiga ah ee badaha si kooban sidaas ayey ku dhisan tahay hadana waxaan soo qaadanaynaa heshiisyada ama xeerarka ay hirgalisay tan iyo markii la aas aasay taariikhdu markay ahayd 1948 magaceedo markaas wuxuu ahaa lagu aasaasey International Maritime Consultative (IMCO) balse magaca hadda ee (IMO) waxaa loo bixiyey 1982, kulankii ugu horeeyey oo ay yeelato Hay'adda waxaa laqabtey kadib aas aaskeedii 1949, isugeyn heshiisyada ay sameysay IMO waa 59 heshiis iyo baratakool 49 kamid ah heshiisyadaas waa dhaqan galeen, 7 kamid ah heshiisyadaas wali uma dhameystirmin qaabkii dhaqan galka, 3da heshiis ee soo hartey sidoo kale wali ma bilaaban nidaamkii dhaqan galka oo dowladaha xubnaha ma aysan saxiixin.

**Heshiisyada Caalamiga ah ee IMO waxaa loo kulmiyaa qayb qayb oo ah sida soo socotta:-**

1- Heshiisyada IMO kuwa ugu waaweyn uguna muhimsan.
2- Heshiisyada xidhidhka la leh badbaadada Badda iyo amnigeeda.
3- Heshiisyada xidhiidhka la leh ka hortagga wasakheynta Badda.
4- Heshiisyada ku salaysan masuuliyadda iyo magdhowga.
5- Heshiis kale.

**1- Heshiisyada IMO kuwa ugu waaweyn uguna muhimsan:-**

- **United Nations Convention on the Law of Sea (UNCLOS 1).**

Heshiiska caalamiga ah ee badaha wuxuu soo maray sedex jaranjar oo lookala bixiyey UNCLOS1, UNCLOS2, UNCLOS3 sedexdaas taariikh ayuu sal dhigtey heshiiskan ilaa laga gungaarey heshiis rasmi ahana lagu gaarey UNCLOS3 heshiiskan caalamiga ah waxaa garwadeen ka ah hey'adda qaramada midoobe dhanka maamulka iyo iskudaba ridkiisa. Hadaan ka bilowno qeybtiisii kowaad ee loo yaqaan UNCLOS1 wuxuu qabsoomey shirkiisii ugu horeeyey 1956 magaalada Genava waxaana kasoo qaybalay 68 dal oo kaliya.

**UNCLOS1** waxaa kasoo baxay afar qodob oo lasoo saarey sanadka markuu ahaa 1958 afartaas qodob waxay kala ahaayeen sidan:

1- Convention of the High Sea; Heshiis ku saabsan badda sare oo dhaqan galay 30 September 1962, waxaana lagu heshiiyey in si xor ah loo mari karo badda sare, in si xor ah hawadeeda loo mari karo, in si xor ah looga kaluumeysan

karo iyo dhigista tuubooyinka iyo xariga Korontada, Inernetka, Telfoonada, iwm.

2- Convention on the Continental Shelf heshiis ku saabsan qeybta Qolfoof Qaaradeedka Badda oo dhaqan galay 10 Juun 1964.

   Dowladda xeebta leh waxay ku leedahay qeybtan iney maamusho badda korkeeda iyo kheyraadkeeda. Laakiin kuma lahan awood maamulka hawada sare iyo biyaha marka la gooshayo, dalalka oo dhan waa u furan tahay.

3- Convention on the Territorial Sea and Contiguous Zone; Heshiis ku saabsan badda dalka iyo badda xigta oo dhaqan galay 10 September 1964,

   Dowladda waxay xaq u leedahay qeybtan biyaha dalka maamulka si buuxda ayey xaq u leedahay, qeybta xigtana sidoo kale balse waxaan laga go'aan gaarin cabirka dowlad kasta ay yeelanayso biyaha awood ahaan.

4- Convention on Fishing and Conservation of Living Resource of the High Seas heshiis ku saabsan kheyraadka kalluunka iyo noolaha ku jira badda sare oo dhaqan galay 20 March 1966, waxaa lagu heshiiyey dowlad xeebeedka ayaa xaq u leh ka faa'ideysiga kheyraadka nool ee ku jira qeybtan.

   **UNCLOS2 1960.**

   Shirkan loogu magac darey UNCLOS2 wuxuu qabsoomey 1960kii, waxaana la isugu yimi magaalada Geneva, qorshaha shirkan wuxuu ahaa in lagu dhameystiro wixii ka dhinnaa qeybtii hore ee UNCLOS1 oo aan dhameystirmin heshiisna aan laga gaarin **Territorial Zone Sea**, **fisheries limits,** labadaas qodob ayaa lagu tala galay in lagu xaliyo, wuxuna socdey shirkii looga arinsanyey lix asbuuc oo isku

xiga, wax go'aan ahna lagama soo saarin oo waa lagu kala kacay, natiija la'aan ayey kusoo dhamaadey.

**UNCLOSIII 1973-1982.**

Kulanka sedexaad ee heshiiska caalamiga ah ee arimaha badaha wuxuu socdey 9sano iyo wax la jira kulankii UNCLOSII ka dib, waxaana kasoo qaybgashey 160 dal, heshiiskan waa heshiiska ugu muhimsan uguna balaaran intii la soo wadey hawlahan, waxaana lagu soo bandhigey xeer ka kooban 320 qodob iyo 9 lifaaq oo lagu maareynayo arimaha badaha, waxaana la saxiixay 10 December 1982. Heshiiskan wuxuu dhaqan galay 1994 tii, heshiiskan waxaa qodobo muhiim ah laga gaarey arimihii muddo lagu murmayey oo heshiis dhab ah laga gaarin, waxaa ka mid ah qodobada heshiiskan lagu xusey ee laga guul gaarey:

1- Xadeenta biyaha dal kasta uu yeelan karo, waxaana loo xadeeyey sidan;
    - Territorial Sea 12nm oo ah biyaha dalka (Biyaha Dalka).
    - Contiguous Zone 12nm oo ah biyaha xiga (Biyaha Xiga).
    - Economic Zone 200nm oo ah biyaha aaga ganacsiga furan (EEZ).
    - Continental Shelf Zone 150nm oo ah biyah qolfoof qaaradeedka, sidaas ayaa loo qeebiyey xadka biyaha sida ku cad xeerka caalamiga ah ee UNCLOS3 qodobadiisa kala ah Qod 3,4,33,55,87.
2- Ilaalinta Deegaan badeedka; Xeerkan wuxuu ahmiyad muhiim ah siiyey ilaalinta xeebta, biyaha badda in laga ilaaliyo wax walba oo dhibaato u keeni kara ama

wasakheyn kara, waxaana loo sameeyey xeerar kale oo arimahaas si qoto dheer uga faaloonaya.

3- Kafaa'ideysiga kheyraadka nool iyo midka aan nooleyn.
4- Cilmi baadhista qeybaha culuumta badda ee kala duwan.
5- Xalinta khilaafaadka dowladaha ka dhaca.

Xeerkan waa kan marjaca u ah aduunka oo dhan arimaha badaha waxaana loo xigtaa arimaha badaha ku saabsan, xeerarka la sameynayo, urur goboleedyada arimaha badaha.

Xeerkan dowladda J.D.S waxay ka mid ahayd dowladihii soo ansixiyey balse xiligii dhaqan galka dowladdeena way burburtey, sidaa awgeed waxaa naga maqan wax badan oo talaabooyin muhiim ah oo aan la sameyn sida gudbinta khariiradda xuduud badeedka badda Soomaaliya dowladda F.S waxaa u suurta gashey 2014 kii in ay dirto nuqul xuduud badeedka badda oo qoraal (Cordinates) ah oo aan lahayn sawir.

Heshiiska Caalamiga ah ee badbaadada naflayda iyo nabad-qabka badda dhexdeeda oo loo yaqaan **SOLAS the International Convention for the Safety of Life at Sea.**

Heshiis **SOLAS** waxaa la soo bilaabay sanadka markuu ahaa 1914 waana heshiiskii ugu horeeyey oo caalami ah kuna saabsan bad oo la hirgaliyo iyadoo laga jawaabayo dhibaatadii weyneyd ee ku dhacdey markabka **RMS TITANIC SANk 15/04/ 1912** oo ay ku dhinteen **1517qof** markabkaas oo kasoo baxay dalka **UK** wuxuuna ku socdey dalka **USA**, kulankii labaad ee heshiiskan wuxuu dhacay **1929**, kulankii sadexaad wuxuu dhacay **1948**, kulankii afraad **1960**, heshiiska **SOLAS** wuxuu dhaqan galay oo uu rasmi noqdey waliba ansixiyeen dowladahan **1974,** waxaana

loo yaqaanaa **SOLAS 74** 158 wax ka badal ayaa lagu sameeyey intuu jirey.

Heshiiska SOLAS waa xeerka ugu balaaran dhanka baaxadda iyo muhimadda, wuxuuna soo jiitamayey laga soo bilaabo 1914**,** waa heshiiskii ugu horeeyey ee badeed oo la hirgaliyo, muhimaddiisuna waa ilaalinta dadyowga ku safraya badda korkeeda oo laga ilaalinayo khatar kasta oo ku iman karta noloshooda iyo badbaadintoda haddii dhibaato qabsato in loo gurmado, xeerkan wuxuu ka kooban yahay **14** cutub oo koobaysa dhammaan baahiyaha badda dhexdeeda aan looga maarmeyn.

**Cutubka 1aad- Qodobo Guud (General Provision).**

Cutubka 1aad ee heshiiska **SOLAS** waa qodobo guud oo faafaahintooda laga arki karo Cutubyada kale ee soo socda.

**Cutubka 2aad – Dhismaha markabka iyo ka hortaga gubashada (Construction and Electrical installations and Fire protection).**

cutubka 2aad wuxuu sheegayaa dhismaha markab ama doon iyo shuruudaha laga rabo iyo waliba agabka lagama maarmaanka u ah nabad-galyada naflayda saran, ka hor taga dab ka dhasha markabka dhexdiisa iyo ogaanshaha goobta gubanaysa si looga hortago inuu ku sii faafo dabka markabka oo idil, qaab dhismeedka qulqulka korontada lagu dhisayo markabka waa iney ahaataa mid aan dhib keenayn oo laga hortagi karo hadii uu dhasho dab.

**Cutubka 3aad- Badbaadada nolosha (Life Saving –appliances and arrangements).**

Waxaa waajib ku ah markabka inuu u diyaarsan yahay badbaadinta noolaha saaran una dhameystiran yahay qalabka badbaadada, sida jaakadda dabaasha waa (**Life Jackets)** iyo doonyaha yaryarka ah ee loo yaqaan **Life Boats,** waa iney ku diyaarsan yihiin maraakiibta dushooda ama jambiga markabka si haddii uu shil dhaco ugu badbaadi karaan dhammaan rakaabka saran markabka ama doonta.

**Cutubka 4aad- Isgaarsiinta Markabka ama Doonta (Radio-Communications).**

Waxaa muhim ah in uu markabka saaran yahay ama uu ku dhisan yahay qalabka loo yaqaan **GMDSS (**Global Maritime Distress Safety System), qalabkan oo ah qalab badbaado iyo nabad-galyo

Manaarado tilmaamaya meesha uu taagan yahay markabka oo loo yaqaan (**EPIRBs)** Emergency position indicating Radio Beacons, iyo qalabka baarista oo badbaada ah iyo qalab telefoon oo ka jawaabaya dirista fariimaha oo loo yaqaan (**SARTs).**

**Cutubka 5aad- Nabad qabka Safarka (Safety of Navigation).**

Nabad qabka ku safridda badda waxay dalbanaysaa agab diyaarsan oo aad looga taxadarey si looga hortago khatar ku imankarta gaadiidka ku socdaalaya badda korkeeda ama hoosteeda waxaana loo baahan yahay in la helo qalab sheegaya heerka cimilada iyo sida ay tahay waa in uu saaran yahay markabka (**Metreological Service for Ships**) waxaa kaloo muhiim ah qalabka jiheeyaha oo casri ah si looga hortago jahwareerka iyo lumitaanka maraakiibta **Routing of Ships** iyo qalabka baaritaanka iyo badbaadada oo lagu ogaanayo markabka meesha uu joogo marka ay cilad ku timaado .

**Cutubka 6aad- Qaadidda Badeecooyinka (Carriage of Cargoes).**

Waxaa muhim ah in qaadidda badeecooyinka ay leedahay hab iyo qaab loo qaado waliba badeecooyinka u baahan in la ilaaliyo siiba kuwa kiimakada ah ama hubka Nuclearka, badeecaddaas gaarka ah waxaa loo sameynayaa calaamad gooni ah ama waxa loo yaqaan Code.

**Cutubka 7aad-Raridda Badeecooyinka khatarta ah (Carriage of Dangerous Goods).**

Cutubkan wuxuu khaas u yahay sida loo maareeyo badeecadaha khatarta ah qaybtiisa hore wuxuu sheegayaa qaabka loo cabeeyo ama loo raro, badeecadaha khatarta ah oo in la ilaasho u baahan waxaa ka mid ah kuwa adag ee qalalan oo aadka u badan, qaab dhismeed gooni ah ayaa looga baahanyahay maraakiibta qaada xamuulka kunteenarada kiimakooyinka qaada oo waliba dareeraha ah, iyadoo la raacayo xeerka **IBC Code** (International of Bulk Chemicals), waxaa lagu qorayaa badeecadda korkeeda xarfaha la soo gaabiyey oo la isku yaqaan si loo ilaaliyo ama looga taxadaro ama looga hortago haddii wax ka yimaadaan.

Maraakiibta qaadda Gaaska dareeraha ah iyo dhismahooda agab ahaan waa iney waafaqsan yihiin xeerka IGC Code (international Gas code) oo loola jeedo nidaamka xakameynta ama ka hortaga gubashada wax kastoo dhib u keeni kara maraakiibta xamuulka Gaaska dareeraha ah waxaana la meel mariyey qaybtan 1986.

Waxaa kaloo Cutubkan muhim ah oo uu ka hadlayaa, xakameynta maraakiibta xamuulka daaqada lagasameeyo hubka nuclearka ee xiran ama maraakiibta xamuulka haraadiga hubka nukleerka ah.

**Cutubka 8aad –Maraakiibta Nukleerka (Nuclear Ships).**

Maraakiibta xamuulka daaqada ah waxaa looga talagalayaa in hubka nukleerka iyadoo la iska ilaalinayo falaaraha shucaaca ay bixinyaan oo waliba u baahan ilaalin gooni ah iyo ka hortag masiibooyinka ka dhalin kara, haddii dhibaato kati maadana looga baahan yahay magdhow cidii masuuliyadda lahayd arinkaas.

**Cutubka 9aad-hawl-galinta Maraakiibta si ammaan ah (Management for the safe the operation of ships).**

Maraakiibta caalamiga ah waxay u hawlgalayaan qaab casri ah oo raacsan xeerarka loo asteeyey sida xeerka loo yaqaan **ISM** (Code of International Safety Management), waxaana laga rabaa mulkiilaha markabka ama doonta inuu mas'uuliyadda qaado ah inuu gaarsiiyo agabkaas laguna xiro.

**Cutubka 10aad- Xakameynta surcada maraakiibta (Safety Measures of High Speed Craft).**

Maraakiibta rakaabka dadweynaha iyo badeecooyinka waxay u baahanyihiin nidaam iyo xeer lagu xakameeyo xawaaraha socodkooda iyadoo laga cabir qaadanayo xamuulka ay sidaan, waxaana loo sameeyey code (HSC high speed craft), iyadoo laga

hortagayo shil ka dhaca badda dhexdeeda oo waxyeeleeya naflayda iyo deegaanka badda intaba.

**Cutubka 11aad- Adkeynta Nabad-galyada Badda (Specially Measures to Enhance Maritime safety).**

Waxaa muhim ah in maraakiibta iyo doonyaha laga kontoroolo marka dekedaha ay soo gaaraan, sida in laga hubiyo dhanka qalabka iyo agabka inuu dhameystiran yahay, haddii aysan u dhameystirneyn qalabkaas wuxuu halis galin karaa markabkaas amni ahaan isu socodka badda iyo shil inuu sababo.

**Cutubka 12aad- Arimo dheeraad ah oo lagu hagaajinayo nabad-galyada badda.**

Waxaa la dhaqan galiyey hishiis nabadgalyada maraakiibta oo caalami ah sanadka markuu ahaa 2002, heshiiskan wuxuu dhaqan galay 2004, waxaana lagu magacaabaa international ship and port Facilities security Cade (ISPS Cade).

**Cutubka 13aad- Xaqiijinta dhabta ah.**

Xaqiijin loo sameynayo si quman oo ku haboon xeerarka dalka uu leeyahay iyo xeerarka caalamiga ee gaadiidka maraya ama gooshaya badda iyo dekedaha dalka uu leeyahay ayaa muhim ah, waxaa kaloo baaritaan dhab ah lagu sameynayaaa waxa uu sido badeecad iyo rakaab kay doontaba ha ahaato iyo hubinta dhanka caafimaadka iyo badqabka markabka iyo shaqaalaha saaran.

**Cutubka 14aad- nabad-galyada maraakiibta maraysa badda Barafka ah.**

Qaybta ugu dambeysa ee xeerkan waxay ahmiyad siisay sidii loo xakameyn lahaa dhibaato kutimaadda gaadiidka maraya badda fadhida, baddaas oo ka duwan badaha kale ee caadiga ah waxayna

u baahantahay in loo diyaariyo maraakiib iyo doonyo khaas ah oo wajihi kara barafka iyo xaaladaha deegaan kaas ka jira. Haddii ay timaado shil ama wax kale waa in loo diyaariyo xaalado degdeg ah

Waxaa la hirgaliyey xeer ama code lagu maamulo arimahaas gaarka ah oo la diyaariyey 2014 waxaana la dhaqan galiyey 2017, waxaana loo yaqaana (Code of Polar Water).

- **Xeerka ka hortaga wasakhda ka timaadda maraakiibta ee kudhacda biyaha badda (Marpol 73/78).**

Xeerka ilaalinta wasakhda maraakiibta ka timaadda ee badda kudhacda wuxuu kamid yahay xeerarka ugu waaweyn aduunka ee badaha wuxuuna ka mid yahay kuwa ugu muhimsan uguna magaca weyn sida kii aan horey uga sheekeenay ee SOLAS74.

Xeerkan waxaa uu soo bilowdey qaybitiisii koowaad 1973 iyo protocol 1978, wuxuuna caan ku yahay magac ahaan **Marpol 73/78**

Wuxuuna ka kooban yahay lix qeybood ama lix nuqul iyo 20 qodob. Guud ahaan xeerkan waxaana ku faahfaahin doonaa halkan:-

**Nuqulka koowaad -Xeerka ka Hortaga Wasakhda Batroolka**

Qaybtan waxay xooga saareysaa xakameynta wasakhda ka iman karta batroolka badda maraya oo ay sidaan maraakiibta shidaalka ama ceelasha ku yaal badda ee qulqul ahaan tuubooyinka u mara, kuwaas oo ay ka iman karto dhibaato deegaan, sidaas awgeed waxaa lagama maarmaan ah in la helo xeerar xakameyn ku

sameeya iyo la xisaabtan. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay 2 Oct 1983.

**Nuqulka labaad- ka hortaga wasakhda kiimikada dareeraha ah oo aadka u badan.**

Ka hortaga iyo ilaalinta wasakhda ka timaadda kiimikada dareeraha ah ee ay sidaan maraakiibta xamuulka ah iyo sida looga ilaalin lahaa deegaan badeedka iney ku daataan, si looga taxadaro kiimikadaas waxaa lagu muujinayaa alaabta korkeeda calaamadda loo sameeyey ee ah (IMDG Code) oo loola jeedo International Maritime Dangerous Good Code. Waxaa calaamaddan lagu muujinayaa kiimikada khatarta ah si looga foojignaado, nuqulkan wuxuu dhaqan galay 1983.

**Nuqul sadexaad –ka hortaga wasakhda ka imanaysa markabka ama doonta dhexdeeda.**

Waxaa xakameyn loo sameeyey oo aad muhim u ah xeerkan ka hortaga wasakhda badda ee **Marpol** in la xakameeyo wasakhda maraakiibta dhexdeeda ka timaadda sida biyaha wasakheysan ee matoorka, kuwa isticmaalka galay ee lagu isticmaalay doonta dhexdeeda ama markabka, musqulaha, nadaafadda markabka kuwa loo isticmaalay biyahaas oo dhan waxay u baahan yihiin sidii loo kontorooli lahaa meesha ay isaga badalaayan gaadiidka badda oo laga ilaaliyo iney isaga shubaan meel aan ku habooneyn in lagu shubo oo ay keenaan dhibaato deegaan iyo waxa laga yeelayo ciddi ku xadgudubta oo kushubta biyahaas wasakheysan. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay 2003.

**Nuqulka afraad-Ka hortaga qashinka kayimadda markabka ama doonta**.

Dhibaatada uu leeyahay qashinka lagu shubo badda dhexdeeda waliba meelaha xeebaha ama dhulku ka dhow yahay, sida walxaha ka sameynsan caagga ama loo yaqaan plastics iyo dhibaatada deegaanka ama noolaha ay u geysan karaan in laga ilaaliyo inaan lagu daadin meelaha dhowdhow oo aad looga fogeeyo xeebta, in dabagal lagu sameeyo gaadiidikii ku xad-gudba arinkaas, xeerkan wuxuu dhaqan galay 1988.

**Nuqulka shanaad-ka hortaga wasakheynta hawada sare.**

Nuqulkan wuxuu ka hadlayaa xakameynta wasakheynta hawada ama uumi baxa oo ka yimaadda maraakiibta iyo doonyaha taas oo suurtagal ay tahay iney wasakheeyaan hawada badda, waxayna sababi kartaa dhibaato deegaan oo waxyeelo u geysan karta noolaha ku nool badda, sida awgeed waxa muhim ah in la kontoroolo maadada saliidda ama shidaalka markabka lana isticmaalo habka loo dajiyey ee caalamiga ah, si ay nabad qab fiican u yeelato badda hawadeeda. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay oo la saxiixay 2005.

Xeerarka **SOLAS74 & MARPOL** 78 waxay ka mid yihiin xeerarka ama heshiisyada Caalmaiga ah ee ugu muhimsan Qawaaniinta badda ee ka hirgalay aduunka, xeerarkan labada ah waxay ilaaliyaan bad-qabka badda deegaankeeda iyo nabad-galyada noolaha iyo manoolaha badda ku dhex jira, xeerarkan waxaa ansixiyey oo dhaqan galyey in kabadan 170 dal oo dunida daafaheeda ku nool, balse waxaan ilaa hadda laga dhaqan galin dalkeena Soomaaliya, waxaana lagu waayey xuquuq iyo waajibaad ku qeexan xeerarkan oo aad muhim inoogu ahaa in laga hirgaliyo dalka Soomaaliya, waliba waxaan ku jirnaa dalalka ay muhiimka u yihiin heshiisyadan aan kor ku soo xusney sababtoo ah waxaan degannahay marin biyood caalamka ay isaga gooshaan oo uu maro shidaalka 40% laga soo saaro wadamada

khaliijka iyo maraakiibta xamuulka ee caalamiga ah 20%, sidaa awgeed waxaan u baahannahay inaan galino dalka feejignaan iyo aragti dheer oo lagu xakameynayo dhibaatooyinka ka iman kara marinkaaas, waxaana aad muhim u ah inaan kamid noqono xeerarkan aan soo xusney ee kala ah bad-qabka maraakiibta iyo noolaha kusafraya badda dhexdeeda (SOLAS74), iyo ka hortaga wasakheynta deegaanka badda ee (MARPOL78), Hey'adda Cilmi-baadhista Badaha Somaaliyeed waxay talooyin badan ku bixisey dhowr jeer oo ay Dowaldda u gudbisey in la dhaqan galiyo heshiisyada caalamiga ah ee aan kor kusoo xusney si aan u helno faa'idooyinka nooga maqan iyo ka mid noqoshada xeerarkan, waxaana rajeynaynaa in xukuumadda fedraalka Soomaaliya ay ansixiso heshiisyadaas caalamiga ah si aan uga mid-noqono saxiixayaasha, waxaa kaloo jira heshiisyo caalami ah oo tira badan waxaa kamid ah heshiisyadaas aadka muhimka u ah:-

- Convention on the Prevention of Marine Pollution by Dumping of Wastes and Other Matter 1972 (Heshiiska ka hortaga wasakheynta badda ee ku shubidda qashinka haraadiga iyo wasakhda ka timaadda berriga, waxaana loo yaqaan LONDON Convention 72.
- Convention on the International Regulations for Preventing Collisions at Sea (COLREG), 1972 (Heshiiska ka hortaga iskudhaca gaadiidka badda iyo xeerarkisa, wuxuuna ka mid yahay heshiisyada ugu muhimsan oo lagu maareeyo isku dhaca iyo ka hortagiisa.
- International Convention on Standards of Training, Certification and Watchkeeping for Fishing Vessel Personnel (STCW-F), 1995 heshiiskan waa mid caalami ah oo kamid ah heshiisyada ugu muhimsan kuwa caalamiga ah.

**Heshiiska Nidaamka Dowladaha Dekadaha leh uga Hortagayaan Kalluumeysiga Sharci-darada ah oo aan nidaam soo marin iyo sidii loo dabar-goyn lahaa (Agreement on port of the Illegal Unreported and Unreguleted Fishing IUU).**

Heshiiskan waa heshiis caalami ah oo ay gar-wadeen ka tahay Hey'adda Caalamiga ah ee cuntada iyo beeraha **(FAO),** si loo hirgaliyo nidaam lagaga hortagayo kalluumeysiga sharci-darada ah waxaa ay hey'addan sameysay qorshe arimahaas ku saabsan sanadka markuu ahaa 2005, waxaana qorshahaas loo badalay heshiis sanadka markuu ahaa 2009 shir-weynihii 36aad ee hey'adda ay ku qabatey magaalada Roma ee dalka Talyaaniga oo xarun u ah hey'adda.

Heshiiskan waxaa la saxiixay 22 November 2009 shirweynihii 36aad ee hey'adda cuntada ee caalamiga ah **(FAO),** shirkaas waxaa kasoo qayb-galay 91 dal oo qeyb ka ahaa wada xaajoodka nuqulka xeerka oo ay wada ogolaadeen, waxaa saxiixay heshiiskan 23 dal mudada saxiixa dowladaha waxay furneyd 2009-2010 kii, heshiiskan wuxuu dhaqan galay 5 Jun 2016 waxaana soo ogolaatey 25 dal waxaana xubin ka ah 34 wadan sdiaas ayuuna ku yahay heshiis meel mar ah oo ay Soomaaliya ka mid tahay in kastoo aan wali la marin golayaasha dowladda Federaalka Soomaaliya, heshiiskan ahmiyaddiisa iyo ujeedooyinka loo sameeyey waxaa weeye sidan:

1- Ka hortaga kalluumeysiga sharci darada ah (IUU) aan soo marin habka ogolaanshaha iyo isdiiwaangalinta.
2- Sidii loogu diyaar garoobi lahaa kalluunka sharci-darada loo guranayo iyo aaladihii la isticmali lahaa loona dabar-goyn karo.
3- Xog-isdhaafsiga dowladaha xeebaha leh iyo wada shaqeyntooda ka hortaggga budhcadda kalluunka.

4- Xoojinta dekedaha ay kalluumeystada ku soo xiranyaan ayadoo lagu sameynayo baadhis waxa uu sido markabka xogtiisa oo dhameystiran, iyadoo lawaafajinayo sharcigan.
5- Doonta inteysan kusoo xiran dekedda waa iney soo wargalisaa hey'adaha kushaqada leh si loo ogaado inay tahay doon si sharci-darro ah uga jilaabanaysey iyo iney tahay mid sharciga waafaqsan.
6- Haddii ay dowladda dakedda leh ay ogaato in doonta rabta iney kusoo xirato dekadda ay tahay mid si sharci daro uga jilaabanaysey kalluun waxaa waajib ku ah dowladda dakedda ineysan ogolaan sii galiddda markabkaas ama doontaas, waxayna ku wargalinaysaa dowladaha kale iyo ururada kashqeeya hawlahan ayadoo laraacayo Qod 9aad, Faqrada 2,3,4 ee heshiiska ka hortagga kalluunka sharci-darada ah (IUU).

## Xeerarka Badaha ee Heer Gobol (Regional Agreements).

Waxaa jira xeerar ama heshiisyo heer gobol ah oo loola jeedo xeerar ay sameysteen ama ay ku heshiiyeen dalal kooban oo ah isku mandiqad ama isku aag ah, waxayna hoos tagaan ama ka tusaalle qaadanayaan heshiisyada ama xeerarka caalamiga ah si loo hirgaliyo ama loo aqoonsado xeerarka heer gobol waxaana isugu tagga dalal tiro ah oo isku zone ah, Somaaliya waxay ka mid tahay heshiisyo dhowr ah oo ay xubin ka tahay oo ah heer gobol waxaana ka mid ah heshiisyadaas kuwan soo socda:-

## The Regional Organization for the Conservation of the Environment in the Red Sea and Gulf of Aden (Jeddah Convention 1982).

Wadamada urur goboleedkan ka mid ah waxaa ka mid ah; Masar, Sudan, Somalia, Jordan, Saudi Arabia, Djibouti, Yeman. Xarunta

ururkan  dowliga ah waxa weeye magaalada Jeddah ee carriga sacuudiga, Waxaana la aasaasey ururkan 1982, wuxuuna dhaqan galay 1995 bishii 9aad, ujeedada loo aasaasey ama loo unkey ururkan waxaa ugu weyn in la helo badda cas oo nadiif ah oo ka caagan wasakh oo idil madaama  Badda cas ay maraan xamuulka shidaalka ay soo saaraan dowladaha carabta qeyb fara badan oo lagu qiyaasey 40%, sida awgeed waxaa loo baahan yahay ilaalin dheeraad ah, ilaalinta amniga iyo bad qabka badda cas, ilaalinta shacaabiga ama cral reefka iyo ilaalinta deegaan xeebeedka wadamada dhaca Badda Cas.

**Djibouti Code Conduct 2009.**

(Heshiiska ladagaalanka Budhcad-Badeedka kuwajahan Maraakiibta marta Galbeedka badweynta Hindiya iyo gacanka Cadmeed).

Waxaa heshiiskan la saxiixay 29 January 2009, waxaa heshiiskan saxiixiisa qayb ka ahaa dowladahan; Somalia, Djibouti, Sudan, Yeman, Kenya, Tansania, Madagascar Ethiopai, Maldevis, Seychelles, Comoros, Egypt, Eritrea, Jordan, Mauritius, Mozambique, Oman, Saudi Arabia, South Africa, Emirates.

Heshiiskan waxaa loogu tala galay iney qayb ka ahaadaan 21 dal balse waxaa saxiixay 20 dal, dalka aan saxiixin waa jasiiradda yare e France Reneune, heshiiskan ama xeerkan waxaa qaban qaabadiisa iyo habka loo fulinayo leh Hey'adda Caalamiga ah ee Badaha (IMO) waliba qaybteeda nabad-galyada badda.

**Sababaha loo abuurey mashruucan ladagaalanka budhcad Badeedka.**

Mashruucan ladagaalanka Budhcad-badeedka ee Djibouti Code Conduct  sababaha loo sameeyey waxaa weeye markay soo

badatey weerarka lagu qaado maraakiibta ganacsiga iyo maraakiibta gargaarka UN-ka ee mara goobtan, weeraradii markay siyaadiyeen ayaa laga maarmi waayey in la abuuro mashruucan aan kor kusoo sheegney oo ay ku mideysan yihiin dowladahan daris wadaaga ah, waxaa la abuuray xarumo lagu kala qaato wararka, waxaa kaloo la abuurey xarumo tababar oo ah heer gobol iyo heer wadan oo kor loogu qaadayo aqoonta dadka ku hawlan arimahan ha ahaato xag difaac oo ciidan ama xag tiknoolajiyadda, xarumaha tababarka waxaa kamid ah xarunta loo bixiyey **DRTC Djibouti** oo ah xarun tababar oo ah sidii loo yareyn lahaa weerarada budhcad badeedka, waxaa ka loo la aasaasey xarumo lagu kala qaadanayo macluumaadka **(information sharing network),** waxaa la abuurey sanadka markuu ahaa 2011 sedex xarumood oo lagu kala warqaadanayo dhanka macluumaadka oo ay dhammaan wadamada ku bahoobey heshiiskan loogu kala qeybiyey sida ay isu xigaan deegaan ahaan waxaana loo kala qaybiyey sida tan; **Darasalam, Mombasa, San'a** xarumahan ayaa waxay ka hawl galayaan ka hortaga weerarada budhcad badeedka iyo isweydaarsiga macluumaadka nabad galayada badda; xarunta San'a waxaa loogu talagalay iney ka hawlgasho jihada waqooyi, xarunta Mombasa waa dalalka dhaca dhexda ama centralka, xaunta Darasalam waxay ku qaybsantahay dhanka koonfurta. warbixinadan waxaa lala wadaagaa urur weynaha NATO oo ciidamadooda ay ka hawlagaalaan gobolka si la isula kaashado ka hortga weeraradaas dhici kara ama dhacay, ayadoo xiliga xarumahan la hirgalinayey ay dhaceen weerardii ugu tirada badnaa 139 weerar, lacagta mashruucan ku baxdey oo ay ku deeqeen wadamada deeq bixiyaasha waxay gaareysaa 1.5bilion oo loogu tala galay in looga hortago khatarta budhcad-badeedka duulaanka ku ah Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed.

**Nairobi Convention 1985.**

Heshiiska ilaalinta deegaan badeedka iyo horumarinta xeebaha dalalka dhaca galbeedka badweynta hindiya, heshiiskan waxaa la unkey taariikhdu markay ahayd 21 jun 1985, waxaana lagu aasaasey kulan kadhacay magaalada Nairobi, waxaana heshiiskan la dhaqan galiyey 30 may 1996, waxaa lagu aasaasey 10 dal oo dhaca jihada galbeedka ee B/weynta hindiya oo kala ah; **Somalia, Kenya, Tansania, Comoros, Seychelles, Madagascar, Fracnce, South Africa, Mosambiqe, Mauritius**.

Heshiiskan waxaa xubno ka ah ururo aan dowli ahayn kuwa gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arimahan ilaalinta deegaan badeedka iyo horumarinta xeebaha galbeedka B/weynte Hindia, sidoo kale waxaa gacan weyn ka gaysta kormeerka iyo fulinta hawlihiisa Hey'adda caalamiga ah ee ilaalinta deegaanka ee magaceda loo yaqaan **UNEP.**

Waxaa kaloo jira heshiis goboleedyo muhim ah oo aan xubin ka nahay oo uu ka mid yahay:

**Indian Ocean Tuna Commision (IOTC).**

Urur goboleedkan ama gudi goboleedkan waxaa kumadeysan wadamada xeebleeyda bad-weynta hindiya waxaana sameysey hey'adda cuntada aduunka ee FAO, waxaana xubno ka ah urur goboleedyo ku hawlan arimaha kaluumeysiga iyo shirkado ka shaqeeya, waxaa lagu aasaasey ururkan iyadoo laga dab qaadanayo heshiiskii lagu dhisay Western Indian Ocean Tuna Organization Convention 19 jun 1991 lakala saxiixdey iyo ayadoo la cuskanayo xeerka caalamiga ah ee arimaha badaha qodobadiisa 56,64 oo sheegaya iney lagama maarmaan tahay in la unko urur goboleedyo iskaashi oo ku saleysan arimaha badaha iyo sidii looga wada, hadaba ujeedadda loo unkay ururkan ama gudigan

waxaa ka mid ah sidii xidhiidh ay u yeelan lahaayeen dalalka ka tirsan waliba xiriir xoogan, isdhaafsiga xogta, tababarada iyo cilmi-baadhista, mideynta suuqa kaluunka, ilaalinta badda, ka hortaga kalluumeysiga sharci darada ah, ka hortaga xaaladah khatarta ku ah kaluunka tunaha, Soomaaliya waxay ku biirtey ururkan sanadka markuu ahaa 2014 oo waxaa saxiixay wasiirkii kalluumeysiga ee xiligaas xilka hayey.

**Xeerarka Badaha ee dalkeena yeeshey mudadii uu jirey.**

Dalka jamhuuriyadda Somalia waxaa soo marey xeerar kala duwan oo ku saabsan arimaha badaha mudadii xornimadiisa ay jirtey iyo ka horba, waxaana dalka Somalia soo marey afar xeer oo kala duwan oo midba midka kale nasakhey, waxayna kala ahaayeen sidan:-

**Somali Maritime Code Lr.1, 21 Febaruary 1959.**

Xeerkan waa kii ugu horeeyey oo ay yeelato dowladda Somalia oo khuseeya arimaha badda, xeerkan wuxuu hirgalay xilli Soomaaliya aysan qaadan xoriyad oo ay kujirtey dowlad daakhili ah oo ay kor ka maamusho UN-ka, sida awgeed heshiiskan awoodiisa iyo madax-banaanidiisa waa yar tahay waxana uu ku qoron yahay luuqad qalaad, waxaa keenay xiligaas waxaa dalka luuqadaha wax lagu qoro ahaa English iyo Talyaani, sharcigana ama xeerkan wuxuu dhigayaa awoodda ay Somaliya ku leedahay Badda ama ay xaqqa u leedahay inuu yahay **6nm** oo u dhiganta 11km, waana badda dalka uu leeyahay, madama xiligaas aysan jirin heshiis caalami ah oo lagu heshiiyey awoodda dalkasta uu leeyahay iyo qeybta uu xaq u leeyahay ee Badda, xiligaas hey’adda maamusha badda waxay ahayd Wasaaradda Ganacsiga, ka dib markii la qaatey xornimadii waxaa mar kale

wax ka badal lagu sameeyey xeerkan xiligaas oo ahayd 1966 oo biyaha qaranka la gaarsiiyey 12nm  ilaa laga soo gaaro, dowladdii kacaanka oo soo saartey sharci ku qoron afka Soomaali oo awood buuxda ku leh arimaha badaha biyaha qarankana waxaa la gaarsiiyey 200nm.

**Sharciga Badaha Soomaaliyeed Lr.7 10 Septembar 1972.**

Sharcigan waxaa lasoo saarey xiligii Dowladdii kacaanka ay jirtey taariikhda la dhaqan galiyey waxay ahayd 10 semtember 1972, sharcigan wuxuu awood buuxda siinayaa dowaladda somaaliya oo xiligaas wax ka badashey xadkii biyaha qaranka ee horey u jirey kana dhigtey 200ml (370km).

Dowladda Soomaliya ay xaq u leedahay cid aan loo ogolaan inaysan ka faa'ideysan karin, waxay meesha ka saartey aagga gaarka wixii loo yiqiiney ee ganacsiga oo aduunka u aqoonsanaa, dowladda DJS waxay ku adkeysatey in uusan jirin aag furan oo la iska maamusho ilaa lagasoo gaarey heshiiskii caalamiga ahaa 1982 lagalay oo awoodda biyaha aduunka la kala qeybiyey oo dowladda **JDS** ay soo saxiixdey.

**Sharciga Badaha Soomaaliyeed Lr.5 26,01,1989**.

Sharcigan waa kan hadda ka shaqeeya JFS oo ansaxa ka ah, wuxuuna waafaqsan yahay xeerka caalamiga ah ee UNCLOS.

Xeerkan Lr.5 wuxuu ku qoran yahay luuqaddeena Soomaaliga oo aad loo turxaan bixiyey, xeerkan dowladdu markay faafinta rasmiga ah la galiyey labo sano ka dib dowladdii way burburtey gabi ahaan waxaa meesha ka baxay wixii xeerar iyo shuruuc dowladeed oo ay lahayd dowladda Soomaaliya, ka dib aasaaskii Hey'adda Cilmi-baadhista badaha Soomaaliya 2014kii, Hey'addu waxay guda gashey sidii ay u soo ururin lahad xeerarkii soo

jireenka ahaa xiligii burburka uu dhacay ka hor, waxaa mahad haka gaadho keydiyey buugga Sharciga badaha Soomaaliyeed **Lr.5 1989 ADM Gaas Prof Farax Axmed Cumar (F.Qare)** oo ahaa xiligii xeerkan la qorayey lataliye sare Wasaaradda Dekedaha & Kaluumeysiga Badda, waxaana suura gashey inuu dhowr iyo labaatankaas sano uu hayo buuggaas oo noqdey marjac iyo meel laga tix-raaco hawlaha maamulka badaha iyo kheyraadkooda, Hey'addu waxay kadib isku hawshey sidii ay u cusbooneysiin lahayd xeerkan oo noqdey mid dayac ka muuqdo maadaama in kudhow 30sano uu meel iska yaalay markii horana lagu qorey makiinadda loo yaqaan teebka, dadaal dheer waaxda Qaanuunka Badaha Hey'adda waxaa u suura gashey iney dib u qorto xeerkan qaab casri ah oo kumbiyuutar lagu qorey waliba waxaa lagu kordhiyey meelaha muhiimka ah ee waafaqsan xeerka caalamiga ah ee **UNCLOS,** waxayna socotey muddo 10bilood ah hawshaas gabagabadii waxaa soo baxay buug casri ah oo lagaarsiiyey xarumaha dowladda oo idil, wuxuuna noqdey xeer difaac u noqda arimaha badaheenna iyo xuquuqda aan ku leenahay.

## Xeerkan L.5 Muxuu kaga Duwanyahay Xeerarkii horey u jirey.

1. Waa xeer dowladda **JS** ay sameysay oo baahi jirtey loo unkey halka kuwii ka horeeyey qeybtood ay dowladnimada horteed la unkey.
2. Waa xeer ku qoran afka **Soomaaliga**, wakhti iyo dadaal dheerba la galiyey, halka kuwii ka horeeyey qaybtood ay ahaayeen luuqad ajaanib kuwa ku qoran.
3. Xeerkan waa mid waafaqsan xeerka caalamiga ah ee badaha lana waafajiyey meelaha uu saameynta kaga leeyahy sida; awoodda dalka uu ku leeyahay biyaha badda oo loo kala

qeybiyey biyaha gudaha, biyaha dalka**12**, biyaha xigg**12**, biyaha gaarka ee ganacsiga **200 EEZ**, qolfoof Qaaradeedka**150nm**.

**F.G:** Eeg Sharciga badaha **Lr.5** 1989, Qod 5,6,7,8 iyo **UNCLOS** Qod 10, 14.

Waxaa kaloo jira xeerar dalka uu leeyahay oo muhim ah sida **Xeerka Kaluumeysiga Soomaaliyeed Lr.23, 30/11/1985** lasoo saarey wax ka badalna lagu sameeyey **25/10/2014** kii, xeerkan oo aad muhiim u ah dhanka kheyraadka nool ee baddeenna ku jira iyo sidii loo dhowri lahaa, wuxuu kaloo hagayaa siyaasaddda wasaaradda kalluumeysiga iyo kheyraadka badda dhanka ilaalinta deegaan badeedka, ilaalinta dhirta badda, ilaalinta noolaha sii dabar go'aya ee heshiisyada caalamiga ah laga gaarey dhowristiisa, sameynta xeer-nidaamiyayaal ay soo saarto wasaaradda oo lagu hirgalinayo xeerarkan lagama maarmaanka ay tahay in la soo saaro, bixinta shatiyada maraakiibta qalaad iyo kuwa wadaniga ah, cilmi-baaris iyo faafinta macluumaadka xaaladda kheyraadka sanadlaha ah.

Hadaba taariikhdu markay ahayd **11/02/2018** waxaa xamar war-murtiyeed ka soo saarey dowladda JFS iyo maamul goboleedyada dalka ka jira waxayna soo saareen nuqul kusaabsan habka bixinta shatiyada oo uu xeerka kaluumeysiga Soomaaliyeed awoodda oo buuxda uu siinayo dowladda dhexe wasaaradda kushaqada leh sida uu sheegayo **Qod 14** ee xeerka kaluumeysiga, waxay war-murtiyeedkooda kusheegeen iney wax ka badal ku sameeyeen qodobkaas oo ay awooddii shati bixinta ay u kala qaadeen biyaha dalka iyo biyaha xigga oo ah **24nm waxaana maamulaya bixinta shatiyada maamul goboleedyad** wixii kashisheeya waxaa awoodda bixinta shatiga iska leh dowladda dhexe, waxay kaloo ku heshiiyeen in la sameeyo hay'ad kaluumeysi oo

maamusha habka kaluumeysiga dalka, waxaa kaloo lagu heshiiyey habka maareynta dakhliga shatiyada kaluumeysiga, Heshiiskan cusub ay dowladda iyo dowladaha xubnaha ka ah ay soo saareen wuxuu u baahan yahay xeerka kalluumeysiga ee 30/11/11/2014 in la waafajiyo.

**Xigasho:**


- UNCLOS1982.
- IMO.
- SOLAS74.
- MARPOL78.
- Nairobi Convention 1985.
- Djibouti Code 2009 IMO.
- Jedda Convention 1982.
- Sharciga Badaha Soomaliyeed Lr.5 1989.
- Xeerka kaluumeysiga Lr.23 1985.
- IUU2009 FAO.



**W/Q: Abdirahim Warsame Dirie**
**Agaasimaha Waaxda Qaanuunka Badaha HCBS.**
**Cabdiraxiim06@hotmail.com.**

# Dowrka Ciidanka Badda ee xaqiijinta Nabadgelyada Badaheenna

Ciidamada Badda ee Dowladaha Caalamku waxay u xilsaaran yihiin Difaaca Badda si loo xaqiijiyo Nabadgelyada Badda; taas oo koobta amniga Xudduudaha Badda, Kheyraadka nool iyo kan aan nooleyn; sidoo kale amniga ku safridda Badda iyo Habsami u socodka howlaha Dekedaha Dalka. Annaga Soomaalida ah, Baddaheenna aamin ayay ka ahaayeen dhinac kasta markii ay jirtay Dowladdii dhexe iyo Ciidankeedii badeed. Waqtigii 1965-1990kii ee uu jiray Ciidanka Badda (gaar ahaan Maraakiibta), aniguna aan ka ahaa sarkaal, AB/le iyo Taliye (1982- 83), wax dhibaata ah oo wax u dhimi kara Nabadgelyada Badda ma dhicin, iskuday mooyee, oo si degdeg ah looga hor tagay halkiisana lagu bakhtiiyey.

Markii aan weynay Dowladdii, ciidamadiina ay raaceen oon noqonnay Dad baahan iyo Dal beylah ah, waxaa meel kasta ka soo butaacay balaayo iyo baas ekeeyey Dad iyo Dalba. Shiddada ugu daranna waxay asiibtay badaheenni (Badweynta Hindiya iyo Bad yarta (Gacanka Cadmeed). Waxaa la iska gurtay Kalluunkeennii; waxay noqdeen Badaheennii waddo Tahriib, ganacsi sharci darro, Hub, Daroogo IWM; howlahaan sharci darrada ah weli way socdaan, waayo wax lagu joojiyo la waa, waa ciidan badeede.

Waxaa la yaab iyo amakaag ah in ajnabigu nagula talinaayey muddo dheer (2000-2018) in Soomaaliya aysan u baahneyn Ciidan Badda Difaaca oo ay u baahan tahay kaliya Ciidan Badda indha indheeyo ayna ku magacaabeen COAST GUARD. Laakiin annaga Soomaalida ah ma fahansan nahay waxa uu qabto COAST GUARD.

## Dowlada leh Coastal-Guard


Dowladaha leh Coastal – Guard waxay ku qabsadaan adeegyadaan maddani (Rayid) sida:

a) Ilaalinta iyo wax ka qabadka wasakheynata Badda
b) Soo badbaadinta dadka wax ku naqday Badda
c) Gacansiinta Maraakiibta dhibaateysan.(soo jiidid)
d) Ilaalinta iyo hagaajinta Minaaradaha iyo Fanaaradaha Xeebaha (Light houses).
e) Ilaailnta canshuuraha iyo ganacsiga sharcidarrada ah
f) I.W.M.

*HADDABA CIIDANKAN LOOGUMA TALAGALIN DIFAAC, UMANA DIYAARSANA MARAAKIIB AHAAN IYO HUB AHAANBA.*

Sidaas awgeed looguma talagalin Difaac umana qaabeysna.

Magaca Ciidakeenna badeed wuxuu tilmaamayaa xilkiisa oo ah Difaac, haddaba haddii aan qaadanno fikradda khaldan ee ah Coastal Guard ciddee noo difaaceysa Qarannimadeenna badeed iyo kheyraadka ka buuxa badaheenna. Sow ma aha beylah ka dhig Baddaada, Qarannimadana qar ka tuur.





**Dowlad kasta markey ka fikireyso Difaaceeda oo ah (qodobka ugu weyn Amniga Qaranka)** waxaa xukumaya halka ay Dunida uga taal, xaaladeeda joqoraafi iyo dowladaha ku wareegsan oo dhib iyo dheefba ay wadaagaan, waana waxa lagu yiraahdo afka qalaad: **(Geopolitic).**

**Haddaba aan xoogaa hoos u galno qeyb ka mid ah geopolitikada Soomaaliya**


1. EEG dhulalka Dowlaha deriska nala ah, waa kuwo goobo (Circle) ah, halka dhulkeennu uu shabbaho Faas (L.7) oo si

fudud lagu ceejin karo (Tusaale Bur-tinle- Eyl= 200 km) oo Ciidanka Casrigu wuxuu ku goyn karaa 1:30 -2saac. Sidaas awgeed Soomaaliya waxay ugu baahan tahay si xad dhaaf ah (Vital) waxa loo yaqaan dhul fidin (Strategic dimension) waana Badda. (sidaas awgeed C.Badda X.D.S wuxuu lahaa Markab dejiye ah oo ku hubeysan BM oo qaada 1 Urur iyo 4Tank).




2. Xuduudaha Badaha Soomaaliya weli la iskuma waafaaqin, sida Jabuuti, Yemen (G.Cadmeed iyo Mandiqadda Suqatara), Seychelles, oo laga yaabaa in xudduudeennu isgoyso, Kenyana dacwo ayaa noo socota. Haddaba xuduuddu haddii aysan hubneyn, waxaa iska soo geli karta

cid kasta, guranna karta kheyraadkaaga ama ku soo xadgudbi karta Siyaaddadaada (Qarannimadda).




**F.G.** Eeg khadadka cas cas waa meelaha aan la xaddidin soohdintooda oo la isku heysto.

3. Kheyraadkeenna Badeed oo ku firirsan baaxad u dhiganta, 2.5 -3 jeer bedka dhulka berriga ah; oo manta beylah ah, la iskana gurto ayadoo loo aaba yeeleyn Bii'ada Badda iyo heerka sii jiridda loo yaqaan ee (Sustainability).



Eeg sida Badda loo guranayo

4. Dhaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu ku taagan yahay wax dhoofin iyo wax soo dhoofsi, sidaas awgeed wuxuu u baahan yahay waddooyin badeed oo aamin ah (Secure Navigation lines).



Xoolaha aan dhoofinno

Xeebaha Soomaaliyeed oo iska wada ah Dekedo dabiici ah waxay khatar ku yihiin Nabadgelyada Qaranka oo hub ayaa laga soo dejin karaa, Askar iyo Mukhaadaraat…IWM.

5. Xaaladda maanta ee tartanka Dekedo doonka iyo saldhigyo Milatery, waxay mudan tahay in aad looga fikiro dhibkeeda iyo dheefteedaba.



6. Mandiqada oon guud ahaan degganeyn, gaar ahaan xagga dhaqdhaqaaqa Islaamiga ah iyo dowladaha taageera iyo kuwa diiddan oo Badda ku wada xarriira.




**Geeska Afrika iyo Dariskiisuba ma Deggana**

Qodobbadaan oo dhan mid aan halis ahayn kuma jiro; waxaana loogu badbaadi karaa waa C.Badeed oo hadda la billaabo qaabeyntiisa, loona jeexo wadda cad oo uu ku koro, waxtarna ku noqdo Berri. Ciddii sheegta xal kale waa cid dooneysa in Soomaaliya ay weydo Badaheeda

**Waxaan rabaa inaan is xasuusinno in Soomaaliya maanta aysan ku fikireyn istiraatiijiyadii 1960-1990kii**, waxay iigu muuqataa inaanan ka filaneyn cadow meel kale ka yimaada oon Badda ka ahayn. Sidaas awgeed waa in loo duubto sidii la isaga Difaaci lahaa cadowga Badda ka soo socda.

**Waxaa run nooga filan, in Dalalka nagu wareegsan ay wada dhisanayaan Ciidan Badeed, xitaa haddii aysan Badba**

**lahayn; waxaa loo diyaargaroobayo sow ma aha degelladeenna.**

Dulucda warkeygu waa caddahay, waana mid u baahan ku dhaqaaqid, kolba tabartu inta ay na gaarsiiso, waaa dhisidda C.Badeed si beri loogu aayo. Dariishadana aan ka tuuro sheeko baralleyda ajnabigu nagu ilduufinayo oo ah (so called) **Coastal Guard.**


Dalkasta wuxuu ka kooban yahay Dhul, Bad iyo Cir; Ciidan kastana waa sidaas. Waxay noocyada ciidamadu u kala muhiimsan yihiin kolba sida Dalka la difaacayo uu yahay. Soomaaliyana waxaa ugu muhiimsan Ciidan Badeed iyo Difaac Xeebeed oo danaha badeed ee Dalkan ilaaliya, Difaacana Qarannimadiisa.

Magaca rasmiga ah ee qaanuuniga ah ee ciidanka badda (1965-1990) waa kan ciidanka badda iyo difaaca xeebaha, mana ahaan karo macaadallaahiye (coastal guard)

Aan maanka ku heyno mar kasta in **Soomaaliya ay tahay Dal Badeed**.

**W/D: ADM. GAAS Prof Faarax Axmed Cumar (F.Qare)**









Ciidan Badeed

# XAQIIQDA HEERKA WASAKHDA XEEBTA CAASIMADDA MUQDISHO

## QORE: HASSAN OSMAN HASSAN

Soomaaliya waa wadan ku yaala bariga qaaradda AFRIKA, waxaana mara Badweynta Hindiya iyo Badda Cas, waxaana Soomaaliya lagu tiriyaa Dalka ugu xeebta dheer Qaaradda AFRIKA, sidoo kale waa dal cimilo wanaagsan, Ilaahna ku galaday kheyraadka dabiiciga ee nool iyo kan aan nooleenba.

Soomaaliya waxey soo martay muddo dheer oo dagaallo sokeeya ka socdeen, taasoo galisay hakad horumarka, tacliinta, caafimaadka, wax soo saarka, iyo dhamaan kaabayaasha nolosha.

Magaalada Muqdisho waa caasimadda Soomaaliya, waa magaalada ugu dadka badan, waana magaalada ugu daran ee burburku saameeyay, haddaba xeebaha magaaladan waxaa aad uga muuqda saameeynta burburka uu ku reebay.

Dadka degan magaalada Muqdisho, xeebta waxey u tahay meel qashin qub oo la wada leeyahay oo wax walbaa lagu qubo, caalamkana badda Soomaaliya guud ahaan waxuu ka dhigtay meel uu ku duugo haraadiga qashinka warshadaha, haraadiga (nuclear) ka iyo wasakh kale oo halis badan.


Hadaba Soomaaliya oo hadda ka soo kabaneysa burbur ay muddo rubuc qarni ah ku jirtay, waxey ku baraarugtay dhibaatada daran ee ka jirta badda Soomaaliya, waxeyna dhidibadda u aasaastay **Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed** 2013, si loo ogaado waxyaabahan:-

- heerka waxyeelada xeebaha Soomaaliya loo geystay muddo ka baddan 25sano iyo sida wax looga qaban karo.
- Inta uu dhan yahay kheyraadka dabiiciga ee nool iyo midka aan nooleyn.
- Sida ugu haboon ee looga faa'ideysan karo kheyraadka baddeena ku jira.

Hey’addan waxey sameysay baaritaano fara baddan oo kala duwan, waxaa ka mid ah baarista HEERKA WASAKHEYNTA BADDA XAMAR.

Baristaan waxaa lagu sameeyay afar goobood oo kala duwan oo ka tirsan xeebaha Magaalada Xamar, waa kuwaan afarta goobood iyo heerka wasakhda ay baaristu cadeysay:-

1- **XEEBTA KAWAAN BARI**: heerka wasakhda goobtaan waa **heer DARAN**, waxaa laga baaray (Total Plate Count) waa dhamaan noolaha ay ishu qaban sida (Bacteria, Fungi), taasoo aad u heer sareeysa mar kasta oo dhanka xeebta loo sii dhawaado, waxaa kaloo biyaha xeebtan ku yar DO (dissolved Oxygen) iyo PH (potential of hydrogen) oo muhiim u ah noolaha badda haday yaraadaan iyo hadeey bataan labadaba halis daran ayey ku noqon kartaa nolasha noolaha badda, sidoo kale waxaa xadka laba laab dhaafay (COD) oo ah heerka $O_2$ka ee falgalada curiyaasha kiimikaalka ah ay u baahan yihiin iyo (BOD)oo ah heerka $O_2$ka ay u bahan yihiin noolaha, COD iyo BOD waxeey saameyn weyn ku leeyihiin kalluunka badda iyo dhirta.





2- XEEBTA LIIDO: Heerka wasakhda goobtan waa **heer macquul ah**, inkastoo (DO) oo heerka standardka hoos uga dhacsan yahay, taas oo dhibaato ku yeelan karta noolaha.

3- **XEEBTA BUUR-FUULE**: Heerka wasakhda waa **heer HALIS** ah, walxaha kiimikada ee heerka standardka ka hooseeya ama ka sareeya waxaa ka mid ah (DO, pH, TURBIDITY, & COD), walxahaan oo heerkooda dhaafay ama ka hoos maray waxey wax yeeleyn karaan qaab dhismeedka jirka kalluunka, taranka kalluunka, jiritaanka geedaha badda gunteeda ka baxa.



Cilmibaarayaasha Hey'adaa oo qaadaya sample biyaha badda goobta waa (Buurfuule) Xamar weyne

Sidoo kale goobtan waxaa si xad-dhaaf ah u dagay (total coliform) oo ah nooc bacteria ah, iyo (total plate count) oo ah isku darka dhaman noolaha ay ishu qaban, sida (bacteria, fungi, etc), kuwaas oo dadka badda ku dabaasha iyo kuwa kalluunka cuno dhibaato u geysan kara.

4- **XEEBTA DEKEDA**: Heerka wasakhda goobtan waa **heer DARAN,** walxaha laga helay waxaa ka mid ah (oil &grease,Tss) oo kala ah shidaalka iyo walxaha adkaha ah ee sabbeynaaya biyaha dushooda, sida,

carada ama dhagxaan, waxeyna saameyn ku yeelan karaan arimaha soo socda:- Taranka geedaha badda, kalluunka iyo shimbiraha badda, quruxda badda. Sidoo kale (Total Plate count & coliform) ayaa laga helay goobtan, oo aan horay usoo xusnay dhibtooda.

Waxaa kaloo ka baarnay biyaha badda curiyaasha naadirka ah ee loo yaqaano **Trace elements**, waxey ka mid yihiin ilaa shan kooxood oo curiyaal kiimikaal ah oo biyaha badda ku milan, curiyaasha Naadirka ah waa dhamaan curiyaasha ee tirada ugu yar ugu jira biyaha badda, waxey biyaha ugu jiraan in dhan 1ppm (part per million), qaarkoodna waxey ugu jiraan in la'eg 1ppb(part per billion) xitaa ka sii yar ilaa part per trillion ayey gaaraan qaarkood.

Mar marka qaar waxaaba adag in la qiyaaso heerka ay biyaha ugu jiraan yaraantooda darteed.

**Saameeynta Curiyaasha Naadirka Ah** in kastoo wax aan la xusi karin biyaha ka yihiin hadana saameyn aad u weyn ayey ku leeyhihiin noolaha badda iyo bani'aadamkaba, waxaa ka mid ah sameyntiisa:

- Inuu kilyaha xayawaanka markuu mudo qaato curiyahan uu wax yeeleeyo
- Inuu unugyada xayawaanka dilo, uu bani'aadamkana cudurka kaankarada (cancer) ka ku rido.
- Inuu indhaha ka rido noolaha.
- Inuu sifooyinka dhaxalka uu badalo genotoxic.
- Inuu hoos u dhigo awooda difaaca jirka noolaha.

Marka ay noolaha badda iyo bani'aadamkaba ay in badan jirkooda galaan waxaa sii bata waxyeelada ay u geysan karaan.

Sameynta ay noolaha iyo dadka ku leeyihiin curiyaashan mar kaliya ma soo muuqdaan oo mudo marka uu noolaha qaato ayay soo baxaan cuduradaan.

Waxaa xusid mudan dalka Kenya kalluunkiisa looma dhoofin karo dalalka Yurub ka dib marka ay curiyaashan (Trace elements) ka ee biyaha badooda ku bateen.

Jadwalka soo socda waxaa ku cad curiyaasha kooxdaan iyo heerka ay biyaha badda uga jiraan:-

**EXAMPLES OF TRACE ELEMENTS IN SEAWATER**

| Trace Element | Concentration (ppb)* |
|---|---|
| Lithium (Li) | 170 |
| Iodine (I) | 60 |
| Molybdenum (Mo) | 10 |
| Zinc (Zn) | 10 |
| Iron (Fe) | 10 |
| Aluminum (Al) | 10 |
| Copper (Cu) | 3 |
| Manganese (Mn) | 2 |
| Cobalt (Co) | 0.1 |
| Lead (Pb) | 0.03 |
| Mercury (Hg) | 0.03 |
| Gold (Au) | 0.004 |

*ppb = parts per billion


**SAAMEYNTA WASAKHEYNTA BIYAHA BADDA:-**

Hadaan si kooban uga hadlo qaar ka mid ah dhibaatooyinka ka imaan kara dhiigga & bakhtiga xolaha, bulaacadaha iyo qashinka lagu shubayo XEEBAHA waxaa ka mid ah:-

- (Eutrophication) oo ah in si xad dhaaf ah u koraan dhirta badda, taasoo keeni karta kalluun iyo dhir farabadan oo dhintay in ay biyaha badda soo caariyaan, ka dib DO (Oxygenka biyaha ku milan) uu ku filnaan wayo noolaha faraha badan ee iskugu soo xoomay ka faa'ideysiga dhiigga iyo nafaqada kale ee badda lagu soo shubay.

- Inuu Libaaxa (Shark) uu xeebta u soo dhawaado si'uu u ugaarsado Kalluunka faraha badan ee meesha iskugu yimid, sidoo kalena ay ka imaan karto inuu dilo dadka xeebta dabaasha u joogo.
- Ineey Kalluumeysatada ay Libaax badan soo qabtaan ama ugaarsadaan, ayadoo la mamnuucay ugaarsiga Libaax badeedka, dabar go'a ku socdo darteed.
- Inuu Kalluunka quuto bulacadihii iyo dhiigii lagu qubay badda ka dibna u gudbiyo dadka cudurada calool xanuunka ama shubanka (daacuun).
- In dhaqaalaha kalluunka ee dibadda ka soo gala Soomaaliya uu hoos u dhaco ka dib marka la'arko in Kalluunka Soomaaliya ka imanaya uusan caafimaad qabin.
- In bilicda iyo quruxda xeebta ay xumaato, ayna saameyso dalxiiska iyo ganacsiga xeebaha u dhow.

Sida daraasadda Hey'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed ay sameeysay ku cad waxaa halis ku jirta nolasha noolaha badda, taas oo dib ugu soo noqon karta dadka iyo dhaqaalaha dalka, ayna suurta gal tahay in ay halistan gaarto heer aan wax laga qaban karin hadii si deg deg ah aan looga gaarin.



## Waa Natiijadii Baaristi Aan Sameynay Iyo Heerka (Standardka) Caalmiga:

**Sawirada (Google Earth) Waa Goobaha Baarista Aan Ka Fulinay**

| mg/L | RESULTS | RESULTS 2 | RESULTS | RESULTS 2 | RESULTS | RESULTS 2 | RESULTS2 | STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 8.20 | 6.13 | 8.19 | 6.16 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | No | | No | | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| DO | 5.13 | 4.16 | 4.67 | 6.87 | 5.29 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | | 1.7 | | 14.8 | | | 2 |
| TSS | 10.3 | 8.58 | 9.8 | 6.43 | 22.0 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | | 7805 | | 7640 | | | 6630 |
| COD | 160 | 412 | 64 | 47.10 | 240 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | | 164.50 | | 20.50 | | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | | <0.001 | | <0.001 | | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | | <0.01 | | <0.01 | | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 6700 | 230 | 260 | 78 | 7700 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 7500 | 310 | 350 | 120 | 8700 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform count; cfu/mL | 110 | 30 | 12 | 3 | 368 | 245 | 67 | NIL |

**Source:**

Jones & Bartlett The properties of seawater

Allen P (1995). Chronic accumulation of cadmium in the edible tissues Modification by mercury and lead  Arch. Environ. Con. Toxicol 29(1): 8-14

## Summary in English:

Somali Marine Resource Research Center sent a team of researchers to make direct observation on Mogadishu coast. After direct field observation, we have seen very bad situation on Mogadishu coastline, there were so many sewage pipes pouring on the coast and the slaughter near the beach spilling blood on the beach and a lot of waste dumps on the coastline and there were many hotels and other business beside the coastline. So, we decided to implement, general survey we've divided the coastline city into four sites to take two samples for each side, once the surface water and once the depth water. The result was as shown in the above table. As you see the table there are three types of parameters that we've chosen which is: - Physical, Chemical and Biological parameters. Note: Because of our limited potential we could not choose all the parameters we were supposed to measure

# Akadeemiyadda Culuumta Badda iyo Qawaaniinteeda ee Khaliif Macow Xasan

**Furitaanka Akadeemiyadda:**

Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed ayadoo ka ambaqaadeysa waajibaadka loo igmaday ee ah in bulshada Soomaaliyeed ay barto aqoonta badaha, maadaama Soomaaliya ay tahay dal badeed biyuhuna uga wareegsan yihiin 3jiho, waxaa lagama maar maan ah in bulshadu ogaato waxna ka barato aqoonta badaheeda iyo kheyraadka ka buuxa sida looga faa'ideysan lahaa.



**Xaruunta Akadeemiyadda oo ku taal Liido (Deg.C/Casiis)**

Sidaa awgeed Hey'addu waxay furtay **Sept 2015** Akadeemiyad lagu barto

Cilmiga Badda si ay bulshadu uga faa'ideysato isla markaanna la helo aqoonyahan Soomaaliyeed oo ku xeel dheer aqoonta badaha.

**Qeybaha ay ka kooban tahay:**

Akademiyada Khaliif Macow waxay ka kooban tahay:-

**1. Kulliyadda Culuuma Badda (Faculty of Marine Science)**

**2. Kulliyadda Qawaaniinta Badda (Faculty of Marine Law)**

**3. Kulliyadda Badmaridda (Faculty of Marine Navigation)**

**4. Kulliyadda Farsamadda Makaanikada (Faculty Marine Engineering)**

Akadeemiyaddu waxay ku howlgashaa nidaamka 4ta sano ee Jaamacadaha,

Ardaydii lagu billaabay Akademiyada Kulliyadood waxay marayaan Semesterkii 6aad, tirada hadda wax ka barata aad ayay u badan yihiin.

Waxaana ku baraarujineynaa ardayda ka qalin jebineysa Dugsiyada Sare inay iska diiwaan geliyaan Akadeemiyadda,

maadaama ay bixineyso Kuliyado muhiim ah oo loogu talo galay in Bulshada Soomaaliyeed oo dhan ay ka Faa'iideystaan.

Macallimiinta asaaska u ah Kulliyadaha waa isla Cilmibaaray-aasha Hey'adda C.B.S. Sidaas awgeed heerka aqoonto way sarreysaa. Sidoo kale Akadeemiyadda waxay leedahay **Dugsi Tababar** oo loogu tala galay in lagu tababarro Badleyda Soomaaliyeed ha ahaadeen Kalluumeysato ama dadyowga Xeebaaleyeda.

**Sida ay u aragtay Bulshada Soomaaliyeed Akadeemiyadda:**

Bulshada Soomaaliyeed qeybaheeda kala duwan waxay aad u soo dhaweeyeen asaasida Akadeemiyadaan iyo howsha ay u qabato bulshada Soomaaliyeed.

**Ahmiyadda Akadeemiyadda:**

Hey'adda C.B.S waxay mar kale baaq u direysaa Shacbi weynaha Soomaaliyeed meel kasto oo ay joogaan inay ka faa'ideystaan Akadeemiyadaan waxna ka bartaan badda baaxadda weyn ee Allah na siiyey, gaar ahaan kuwooda danaynaaya Cilmiga barashada badda Soomaaliyeed.



Waa ardaydii Kuliyadaha kala duwan ee Akadeemiyadda






Waa fasal ka mid ah Akadeemiyadda

# Dekeda Muqdisho oo bilowday xilli habeen ah inay shaqeyso



Markab laga dajinaayo xamuul xili habeen ah Dekedda Muqdisho

Dekeda Muqdisho oo ah dekeda ugu weyn dalka Soomaaliya ayaa bilowday inay shaqeyso xilli habeen ah iyadoo Dowlada Federalka ay bilihii la soo dhaafay dadaal u gashay sidii ay dekeda habeen iyo maalinba u shaqeyn lahayd.

Dekeda ayaa waxaa booqday mas'uuliyiin kala duwan iyagoo u kuurgalayay sida ay howlaheeda ay u socoto waxaana mas'uuliyiintaas horkacayay Ra'iisul Wasaare ku-xiggeenka xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mahdi Maxamed Guuleed (Khadar) waxaana ka mid ahaa xubno ka tirsan golaha wasiirada, saraakiisha amaanka.

Tan iyo burburkii dowladii hore Dekeda Muqdisho waxa ay ku koobneyd howlaheeda maalinta oo kaliya iyadoo xilliyadii dowladii hore iyo muddo ka sii horysayba ay shaqeyn jirtey habeen iyo maalin.

# ISAFGARAD Dowladaha (Soomaaliya & Itoobiya)




Qodobada ugu Muhiimsan Heshiiskii ay kala Saxiixdeed Soomaaliya iyo Itoobiya.

Kadib kulan muhiim ah oo Muqdisho ay ku yeesheen madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo wafdigii uu hoggaaminayay Raiisul Wasaaraha Itoobiya ayaa waxaa lagu heshiiyay ilaa **16 qodob** sida soo socota:-

1. Hoggaamiyaasha labada dhinac waxay ka wada hadleen arrimo badan oo quseeya labada dal, Gobolka iyo guud ahaan caalamka, intii kulankoodi u usocday ayaa labad mas'uull waxay dib u soo cusboonaysiiyeen balanqaadyadii ahaa xoojinta  xiriirka ku dhisan walaltinimo, dhaqanka, derisnimada iyo istixgelinta labada dal.

2. Waxaa lagu heshiiyay in dib loo soo cusboonaysiiyo xoojinta xiriirka ku dhisan wadasheynta guud, xiriirka diblomaasiyadeed ee ka dhexeeya Soomaaliya iyo Itoobiya iyo iyadoo la dhowrayo madax banaanida labada dhinac.
3. Labada mas'uul waxay soo dhaweeyeen dhismaha guddi ka shaqeeya iskashiga labada dal oo horey loogu heshiiyay, kaasi oo ah heer wasiiro, kaasi oo ka shaqeyndoona horumarinta ilaaqaadka diblomaasiyadeed iyo midka ganacsi ee labada dhinacaba leh.
4. Sidoo kale hirgelinta xafiisyo diblomaasiyadeed iyo qunsuliyado ay labada dowladood si is dhaafsi ah uga sameynayaan magaalooyinka gobolada dalalka Soomaaliya iyo Itoobiya, fududeynta isdhexgalka bulshada sida socdaalka, gaar ahaan dhinacyada waxbarashada, ganacsiga, dhaqanka.
5. Waxaa la isla gartay muhiimadda iskaashiga horumarinta dhaqaalaha, iyadoo loo marayo maalgashi lagu sameysto labada dal, iyadoo hadafka uu yahay sidii barwaaqo loo gaari lahaa labada dal iyo guud ahaan qaaradda Afrika ugu dambeyntii.
6. Waxaa lagu heshiyay in meesha laga saaro aqabadaha ku horgudban horumarinta ganacsiga iyo dhaqaalaha labada dal, si loo xaqiijiyo sugnaanta isdhexgalka dhinaca dhaqaalaha iyo in laga kala faa'idaysto awooda wax soo

saar ee dadka, sidoo kale horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha sida Dekedaha, waddooyinka.

7. Qodobka todobaad oo la isla soo hadal qaaday ayaa waxaa ka mid ah dhiirogelinta maalgaashiga, gaar ahaan ilaa 4 dekedood, waxaa ay isku raaceen in si wada jir ah loo maalgashado ilaa afar dekadood oo muhiim ah oo ku yaala Soomaaliya, dhismaha waddooyinka isku xira Soomaaliya iyo Itoobiya, waxaana la dhisidoonaa guddi farsamo oo ka shaqeeya hirgelinta qodobada lagu heshiyay.
8. In laga faa'idaysto awooda iyo fursadaha dhaqaale ee xagga suuqa, iyadoo la sameynayo maalgelin shirkadaha sida gaarka ah loo leeyahay, taasi oo hadafkeedi uu yahay in fursado shaqo loo abuuro bulshooyinka labada dhinac.
9. In loo baahanyahay xoojinta nabadda iyo xasilooni waarta oo ay kunoolaadaan shacabka labada dal, la iskana kaashado la dagaalanka argagixisada, waxaana si wada jir ah loo cambaareeyey falalka argagixisanimo nooc kasta oo ay ahaadaanba.
10. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa ay uga mahadcelisay dowladda Itoobiya ciidamadeeda oo qeybta ka ah AMISOM sida ay naftoodi ugu hureen in ay shacabka Soomaaliyeed ay ka difaacaan cadowga Alshabaab.
11. In mudnaan gaar ah la siiyo dowrka AMISOM ee nabadda iyo dib u dhiska Soomaaliya, waxaa la isla gartay

muhiimadda ay leedahay in si wada jir ah looga hortago qatarkasta oo ku wajahan gudaha iyo dibadda, waxayna si wada jir ah ugu baaqeen dowladaha kale saaxiibada Soomaaliya in ay kaalintooda ka geystaan dib u dhiska iyo nabadeynta Soomaaliya.

12. Waxay si wada jir ah oo cad u sheegeen in dhankasta oo xushmeeyo madaxbanaanida dalka kale, iyo sharafta dhuleed iyo kala madaxbanaanida siyaasadeed, iyadoo loogu baaqay dhamaan hogaamiyaasha Soomaaliyeed in si dhab ah uga wada shaqeeyaan midnimada iyo wada jirka Soomaaliya.
13. Arrimaha caalamiga ah, waxaa ay ugu baaqeen QM in ay la timaado nidaam waxtar badan oo isku-dhafan oo leh dib-u-habeyn iyo xoojin, iyadoo sidoo kale isku raacay in loo dodo wadamada Afrika dhibaatooyinka haysa in xal waara loo helo.
14. Raiisul wasaaraha Itoobiya ayaa ku ammaanay hoggaanka dowladda Soomaaliya sida ay uga dhabeeyeen balanqaadyadoodi ahaa in dalka horumar lagu soo dabaalo, waxaana uu xusay in dowladdu ay ku guuleysto in ay ka gudubto aqabado badan islamarkaana ay u jahaysatay dhanka horumarka.
15. Madaxweynaha JFS Mudane Maxamed C/llaahi Farmaajo ayaa ugu hambalyeeyey Ra’iisul Wasaaraha Itoobiya xilka

cusub ee loo doortay dhawaan, wuxuuna Madaxweyne Farmaajo ku booriyay in uu fuliyay qorshihiisa isbedelada ah iyo hadafka dheer, uuna noqdo mid waxtar uleh Itoobiya iyo guud ahaan gobolka.

16. Madaxweyne Farmaajo oo ku hadlayay magaca shacabka iyo Dowladda Soomaaliya ayaa u mahadceliyay Raiisul Wasaare Abiy Axmed Cali, kaasi oo dhankiisa u mahadceliyey Madaxweynaha Soomaaliya iyo guud ahaan shacabka Soomaaliyeed sida wanaagsan ee loo soo dhaweeyey isaga iyo wafddigiisa.

**Xigasho:** **http://www.jowhar.com**

**War murtiyeedkii laga soo saaray Isafgaradkii ay kala saxiixdeen labada Madaxweyne (Soomaliya iyo Eriteriya).**



Iyadoo maanka lagu hayo xiriirka iyo saaxiibtinimada qotoda dheer ee labada shacab ee Ereteriya iyo Soomaaliya, ayada oo dib loo millicsanayo xaqiiqada ah in shucuubta Soomaaliya iyo Ereteriya ay si joogta ah isu garab istaageen, isuguna taageereen halgankii mid kasta ugu jirey xornimada, madaxbannaanida iyo horumarka; Iyada oo lagu salaynayo xiriirka walaaltinnimo ee taariikhiga ah iyo dedaalka ay labada dowladood ugu jiraan yagleelidda iskaashi labada dhinac ah, oo u faa'iidaynaya labada dal iyo guud ahaan gobolka.

Dowladaha Ereteriya iyo Soomaaliya waxay ku heshiiyeen qodobbada soo socda: –

1. Soomaaliya waxay ku taallaa goob istiraatiiji ah, waxayna leedahay khayraad tiro badan oo isugu jira kuwo aadmi iyo kuwo dabiici ah.

Laakiin, ka faa'iideysiga khayraadkaas waxa ka hor istaagey dhibaatooyinka gudaha ka jira iyo faragelin dibadeed. Sidaasi darteed, Ereteriya waxay si mug leh u taageereysaa madaxbannaanida, siyaasadeed, qarannimada iyo midnimada Soomaaliya si dalku u soo ceshado maqaamkii uu ku dhex lahaa dunida, loona xaqiijiyo himilooyinka shacabka Soomaaliyeed.

2. Soomaaliya iyo Ereteriya waxay dedaal gelinayaan sidii ay u sameysan lahaayeen iskaashi taabanaya dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, arrimaha bulshada, dhaqanka, difaaca iyo amniga.

3. Labada dal waxay yagleelayaan xiriir diblomaasiyadeed iyaga oo is dhaafsanaya danjireyaal, sarena u qaadaya ganacsiga iyo maalgashiga dhexdooda ah, sidoo kalena isweydaarsanaya fursadaha la xiriira waxbarashada iyo dhaqanka.

4. Ereteriya iyo Soomaaliya waxay si wadajir ah uga hawlgelayaan sidii loo horumarin lahaa nabadgelyada, xasilloonida iyo isdhexgalka dhaqaale ee gobolka.

**Xigasho:** http://www.jowhar.com

# Markab dhuxul ka qaaday Soomaaliya oo gaaray Ciraaq iyo (Dowladda Soomaaliya oo dacwad ka gudbisay)



Safiirka Soomaaliya u fadhiya Qaramada Midoobey Abuukar Daahir Cusmaan (Abuukar Baalle) ayaa sheegay in Markab dhuxul ka qaaday Soomaaliya uu ku xirtay Dekedda Umm Qasri ee dalka Ciraaq.

Wareysi uu siiyay laanta afka Soomaaliga ee VOA ayuu ku sheegay in markabkan uu siday illaa 200,000 jawaan dhuxul ah, isagoo ka codsaday dowladda Ciraaq in arrintan ay baarto, isla markaana hubiso markabkan shixnada Dhuxusha siday ee ku xirtay dalkeeda.

Abuukar Baalle ayaa sheegay inay sii ogaayeen intii Markabkan wadada ku sii jiray, isla markaana ay ka gudbiyeen dacwad Hey'adaha ay quseyso, gaar ahaan Guddiga cunaqabateynta hubka ee saaran Soomaaliya.

Markabkan ayaa la sheegay inuu dhuxusha ka qaaday Dekeda Kismaayo, inkastoo uu ka gaabsaday Danjire Abuukar Baalle oo sheegay inay ka war-dhowrayaan baaritaanka socda sida uu hadalka u dhigay

Waxaa uu sheegay in Dhuxusha sharci darada ay xayiraad ka soo saartay Golaha Ammaanka Qaramada Midoobey, iyadoo loo arkay inuu xaalufinayo dhirta deegaanka, isla markaana ay dhaqaale ka helaan Kooxda Al-Shabaab.

Danjire Abuukar Baalle ayaa sheegay in dhuxusha ay dhoofiyaan Ganacsato aan dadka u naxeyn, isla markaana Al-Shabaab ka hesho dhaqaale aad u fara badan, taasoo uu xusay dhoofinta dhuxusha sharci darada ka mid tahay ilaha ay Argagixisada ka hesho dhaqaalaha.

Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey ayaa horay u soo saaray qaraar mamnuucaya dhoofinta dhuxusha Soomaaliya, waxaana dhuxusha ay sheegtay inay dhaqaale ka helaan Al-Shabaab oo xiriir la leh Al-Qaacida.

**Xigasho:** http://www.jowhar.com

## **Dhibaatada Dhuxusha Dalka laga dhoofiyo (**Warbixin Monitoring Group)

Warbixinta ay diyaarisay hay'adda la socodka cunaqabateynta Soomaaliya iyo Eriteria waxay ahayd xog ku saabsan dhoofinta Dhuxasha Soomaaliya, waxa ay sheegtay in 29 Markab ay qaado Dhuxasha sida sharci darrada ah looga dhoofiyo Soomaaliya, 29kaan Markab ayaa horay waxay ugu jireen warbixin kal hore ay qortay hay'adda, waxeyna hay'adda ku qiimeysay danbiilayaal soo noq noqday, 25 ka mid ah Maraakiibtaan waxey ku safaraan calanka wadanka Hindiya halka 4ta kalana ay ku safraan calanka wadanka Sirilaanka. Maraakiibtaan ayaa waxey warbixintu sheegtay in ay isticmaalaan diiwaan galin been abuur ah ayadoo xustay in ay arkeen Maraakiibtaan si sharci darra ah looga diiwaan galiyay wadamada Leybeira iyo Siraliyoon taasna waa hannaan been abuur ah oo ay milkiilayaasha Maraakiibtaan uga dhuumanayaan in la ogaado maadama ay ku xad gudbayaan cunaqabateynta caaalamiga ah.

Dhuxushaan ayaa loo dhoofiyaa wadanka Isutaga Imaaraadka Carabta ayadoo la sii marsiiyo dekada dalka Iiraan ka hor inta aan la sii marsiin Iiraan Dhuxusha loo diri jiray dekadaha Duqma iyo Shinis ee dalka Cumaan, balse markii ay mas'uuliyiinta dalka Cumaan qabsadeen Markabkii ahaa Al-azhar3 horaantii March

sanadkan 2018, waxeyna Maraakiibta Dhuxusha dhoofiya u wareegeen dekedaha Kish iyo Qeesh ee dalka Iiraan oo ay illaa iyo hadda ka degto Dhuxusha laga soo dhoofiyo Buurgaabo iyo Kismaayo.

Marka ay ka degto dekadaha dalka Iiraan ayaa dib loo baceeyaa ayagoo ku qoraya in laga keenay Iiraan, waxaan loo dhoofiyaa dekedda Xamriya ee dalka Imaaraadka.

Kooxaha Dhuxusha dhoofiya ayaa mararka qaar isticmaala shahaadooyin been abuur ah oo ay ku sheegayaan halka ay Dhuxusha ka keeneen, waxeyna hay’adda heshay halka laga keenay shahaadooyinkaas oo ay ku sheegtay dalalka Comoros, Ivory Coast iyo Ghana. Afar shirkadood oo ah kuwa wax dhoofiya ayey Hay’adu magac dhawday, kuwaas oo suura galiya Dhuxusha ka timaada Iiraan saldhigooduna yahay dalka UAE, Monitoring Group waxaa ay sheegtay in ay warqad u dirtay dalka Iiraan 29 Janaayo 2018, waxaana ay ku wargalisay shahaadada wax dhoofinta oo been abuur ah laguna sameeyay magaca dalka Iiraan, bishii September 17keedii ayey ka soo jawaabtay Iiraan in kastoo waxyaabo badan oo ku qornaa warqaddii loo diray aysan ka jawaabin, waxaana lagu xusay in Iiraan ay baaris ku sameeyneeyso arrimahaas.

Sidoo kale Monitoring Group laba jeer ayey u dirtay qoraal ay Imaaraadka ku waydiineyso faah faahin ku saabsan halka ay ka

timaado Dhuxusha loo soo marsiiyo Iiraan iyo dokumintigooda, balse Imaaraadka kama aysan jawaabin.

Warbixinta waxaa ay qortay in ilaa 8 qof ay ku sheegtay kuwa Dhuxusha ka dhoofiya Kismaayo kuwaas oo magacyadoodu ay ku xusan yihiin warbixinta, qaarna waxa ay joogaan Dalka Isutaga Imaaraadka Carabta.

Hay'adda waxaa ay sheegtay in bacda Dhuxusha ah ay Imaaraadka ka joogto qiima lacageed dhan oo 190 Dirham oo u dhiganta 52 Doolar.

Xigasho: Idaacada VOA, 15/11/2018

## Wasiir Bayle:"Soomaaliya waxay ku guuleysatay inay fuliso sharuudihii dayn cafinta"



Shir jaraa'id oo uu qabtay Wasiirka Maaliyadda Soomaaliya Cabdiraxmaan Ducaale Beyle waxa uu faah-faahin ka bixiyay guulaha Soomaaliya ay ka gaartay hagaajinta Maaliyadda isagoo xusay in lacag gaareysa afar bilyan iyo bar dollar oo deyn ah lagu leeyahay dalka Soomaaliya.

Wasiir Beyle ayaa sheegay inay Dowlado dhowr ah ay u yimmaadeen una sheegeen inay Soomaaliya ku leeyihiin deymo, wuxuuna sheegay in ay u direen caddaymo muujinaya saxiixyadii Dowladdii hore ee Soomaaliya, maaddaama uu Dalku ka dhacay bur-bur, isla markaana uusan jiri keyd loo noqdo.

Mudane, Beyle ayaa sheegay inay Dowladaha qaarkood ku guul darraysteen in ay keenaan caddeymo dhab ah oo lagu qanci karo, taasoo keentay inay ka jaraan Kharashaadkii ay sheegteen, taasoo hadda lacagta deynta ah ka dhigeysa 4 Bilyan iyo bar Doollar, halka ay markii hore ka ahayd 5 Bilyan iyo bar.

Hase yeeshee wasiirka ayaa sheegay in guulo ay gaartay dowladda Soomaaliya isagoo xusay shuruudihii ugu muhiimsanaa ee deymaha looga cafinayo Soomaaliya ay ka gudubtay ka hor waqtigii loogu tala galay sida ay qireen madaxda hey'adda Lacagta Adduunka.

Wasiirka Maaliyadda Soomaaliya waxa uu sheegay in Soomaaliya ay deeq bixiyayaasha caalamka oo ay ugu horreeyaan Bangiga Adduunka iyo Midowga Yurub ay ugu deeqeen 427 Milyan oo Dollar-ka Maraykanka ah, iyagoo ka duulaya sidii ay Soomaaliya u fulisay shuruudihii ku xirnaa nidaamka deyn cafinta.

Wasiir Beyle waxa uu meesha ka saaray in ay deyn tahay Lacagta Bangiga Aduunka ugu yaboohay Soomaaliya, taasi oo ay warbaahinta qaar daabaceen.

"Waxaan halkan ka sheegayaa inay Lacagtan Soomaaliya la siiyay ay deeq tahay, deyn ma qaadan karno ", ayuu yiri wasiir Beyle.

Hase yeeshee Bangiga adduunka ayaa ballanqaaday ku dhowaaqay in 80 milyan oo dollar ay ugu deeqeen dowlada Soomaaliya halka Midowga Yurubna uu ku dhowaaqay lacag dhan 116 milyan oo dollar.

Dabagalka Lacagta deynta ah ee caalamku ku leeyahay Soomaaliya ayuu soo hadal qaaday wuxuuna sheegay in ay ogaatay Wasaaradda maaliyadu Lacag dhan Hal Bilyan oo Doollar inaan la heyn ciddii saxiixday iyo sida ay ku timid.

Dowladda Federaalka ayuu sheegay in madaxdeedu ay ka go'an tahay hagaajinta maamulka Maaliyada si caalamku u aamino loogana cafiyo deymaha lagu leeyahay iyo kobcinta dhaqaalaha si ay Soomaaliya u gaarto isku filnaan.

Wadahadallada deymaha caalamku uga cafinaayo Soomaaliya ayaa dhamaanaysa marka la gaaro Bisha May ee Sanadka soo socda, waxanay Dowladdu u muuqataa mid muhiimad gaar ah siisay hagaajinta maamulka maaliyadda oo ku xiran horumar ka Dalkeenna.

**Xigasho:** http://www.jowhar.com

# Xuska iyo baroor-diiqda Sanad kaddib qaraxii 14 October ee ka dhacay Isgoyska Zoobe






Waxaa Isgoyska Zoobe ka dhacay munaasabad xusuus iyo duco loogu sameeyey sanad-guuradii koowaad qaraxii weynaa ee 14-October 2017, waxaana Isgoyska soo buux dhaafiyay dadweyne fara badan oo ka kala yimid degmooyinka Gobolka Banaadir.

Munaasabadda xuska iyo tiiraanyada qaraxii 14 October ayaa waxaa ka qeyb galay Madaxda dowladda Federaalka iyo Maamulka G.Banaadir, Labada Gole, iyadoo halkaas Alle bari loogu sameeyey dadkii ku dhintay qaraxaas.

Dadka ku dhintay qaraxaas ayaa isugu jiray qeybaha kala duwan ee bulshadu ka kooban tahay, waxaana uu ahaa qarax galaaftay dad aad u farabadan dhammaan intii bulsho ee nooc walba leh ee Isgoyska ku sugnaa, waxayna goobtaas aheyd meel aad u mashquul badan.

Taalo ama astaan lagu xusuusanayo musiibada qaraxii 14 October ayaa laga taagay Isgoyska Zoobe.

Ammaanka ayaa si aad ah loo adkeeyay, waxaa Isgoyska Zoobe ku sugan Ciidamada Amniga.

Ra’iisul Wasaaraha Dalka Mudane Xasan Cali Kheyre oo goobta ka hadlay ayaa u balan qaaday caruurti agoonta ku naqatay in Wasaarada Waxbarasha ay siiso waxbarasho lacag la’aan ah.



## Wasaaradda Dekedaha oo baabi'isay shahaadooyinka diiwaan gelinta ee Maraakiibta sidata Calanka Soomaaliya



Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda ee Xukuumadda Soomaaliya ayaa wareegto ka soo saartay maraakiibta sita Calanka Soomaaliya, iyadoo gebi ahaanba ay baabi'isay shahaadooyinkii diiwaan gelinta ee maraakiibta Ganacsi iyo kuwa Kalluumeysiga ee sita Calanka Soomaaliya.

Wareegtada ka soo baxday wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa sidan u qorneyd:-

"Iyaddoo laga ambaqaadayo dardar-gelinta waajibaadka shaqo ee Wasaaradda u xilsaaran tahay sidoo kale muhiimad gaar ah la

siinayo horumarinta nabad gelyada iyo badbaadada nolosha badmaridda waxay Wasaaradda soo saartay qodobadaan soo socda:-

1-Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda waxay Baabi'isay/tirtirtay dhammaan Shahaadooyinkii diiwaan gelinta Maraakiibta Ganacsiga iyo Kalluumeysiga ee sita Calanka Soomaaliya.

2-Dhammaan shahaadooyinka Diiwaan gelinta ee Maraakiibta Ganacsiga iyo kuwa Kalluumeysiga kana diiwaan geshan Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda waa in lagu soo celiyaa sida uu qabo Sharciga Badda Soomaaliyeed.

3-Markabkii /Doontii ku qaadata Calanka Soomaaliyeed si aan waafaqsaneyn Sharciga Badda waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa Caalamiga ahba.

4-Wasaaradda waxay soo saari doontaa Xeer-nidaamin cusub oo lagu diiwaan gelin doono Maraakiibta iyo Doonyaha, iyaddoo la hubinayo inuu buuxiyey shuruudaha u tilmaamay qaanuunku, si loo oggaado Calanka Soomaaliyeed.

5-Milkiileyaasha Maraakiibta iyo Doonyaha u hoggaasami waaya qodobada ku xusan wareegtadaan waxaa si deg deg ah looga qaadayaa talaabo waafaqsaneyn Sharciga."

Gabagabada Wareegtada ka soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ayaa lagu sheegay in laga bilaaboTaariikhda wareegtadaan la saxiixo la baabi'iyey

dhammaan Shahaadooyinkii diiwaan gelinta Maraakiibta Ganacsiga iyo kuwa Kalluumeysiga ee sita Calanka Soomaaliya, waxaana sidoo kale Wareegtada lagu xusay in Wasaaradda 25 Novermber ee Sanadkaan 2018 ay bilaabeyso diiwaan gelinta rasmiga ah ee Maraakiibta, si waafaqsan Sharciga dalka.

# Dooni mareysay meel ku dhow xeebaha Somalia oo gantaal lagu burburiyey



Ciidanka la dagaallanka Burcad badeeda ee Midowga Yurub ayaa sheegay inay qarxiyeen Doon ay wateen koox Burcad badeed Soomaali ah oo isku dayaysay inay afduub geystaan.

Qoraal ka soo baxay Saraakiisha Midowga Yurub ee jooga xeebaha Somalia ayey ku sheegeen in burcad badeedda oo watay dooni yar ay isku dayeen inay afduubaan markab watay Calanka Hong Kong.

Weerarkaas ayey sheegeen inuu fashilmay waxaana ciidamada Midowga Yurub oo ka jawaabayay isku daygaas ay gantaal ku dhufteen doontii ay wateen burcad badeedda Soomaalida oo gebi ahaanba burburtay.

Howlgalka Midowga Yurub ee xeebaha Somalia ma sheegin khasaaraha nafeed ee ka dhashay Doonta ay wateen Burcad Badeedda ee ay qarxiyeen.

Waxay intaas raaciyeen in sanad iyo barkii la soo dhaafay uusan dhicin hal weerar oo burcad badeedu ku guuleysatay, iyagoo xusay iney sii wadi doonaan xeebaha Somalia iney burcad badeeda ka ilaaliyaan si maraakiibta ganacsiga ay u nabad galaan.